GCPEA
Global Coalition to Protect Education from Attack

THE ROMÉO DALLAIRE CHILD SOLDIERS INITIATIVE

DALHOUSIE UNIVERSITY

FULINTA TILMAAMAHA

HAB-RAAC LAGU FAHMI KARO, LAGUNA FULIN KARO

TILMAAMAHA KA DIFAACIDDA ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA MILATERIGA ADEEGSADA XILLIYADA COLAADDA HUBAYSAN

FULINTA TILMAAMAHA

HAB-RAAC LAGU FAHMI KARO, LAGUNA FULIN KARO

TILMAAMAHA KA DIFAACIDDA ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA MILATERIGA ADEEGSADA XILLIYADA COLAADDA HUBAYSAN

Farriin ka Socota Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA)

Weerarrada lagu beegsanayo waxbarashada ayaa ka dhaca dalal badan oo ay saameeyeen colaadaha hubaysan, waxaana ay iskuullada iyo jaamacadaha u diidaan ammaanka ay u baahan yihiin ardada iyo macallimiinta si ay uga shaqeeyaan mustaqbal wanaagsan. Xarumahaasi waxbarashada ayaa laga dhigaa qeybo ka mid ah goobaha dagaalka, inkastoo ay jiraan shuruuc caalami ah oo dhinacyada ugu baaqaya inay sida ugu macquulsan dhibaatada dagaalka uga badbaadiyaan dadka rayidka ah iyo hantidooda.

Hab-raacani waxa uu ku salaysan yahay *tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan* (halkan waxaa looga isticmaali doono "tilmaamaha", oo uu ku jiro lifaaqa 1-aad ee habkan) waxaana uu ka kooban yahay tiro qaabab waxqabad ah oo looga gol-leeyahay inay gacan ka geystaan cashar bixinta iyo hagidda wasaaradaha gaashaandhigga, tababarayaasha milateri, saraakiisha, askarta, iyo dhiggooda ururada hubaysan ee aan dowliga ahayn ee ku lugta leh qorsheynta iyo fulinta hawlgallada milateri. Hab-raacani ma uu bedalayo siyaasadaha iyo hagidda qaran ee ku saabsan mawduucan, balse waxaa looga gol-leeyahay inuu gacan ka geysto hormarinta siyaasadahaasi iyo tababarada la xiriira ee hannaanka qaran. Sidoo kale, habkan iyo tilmaamahan waxa looga gol-leeyahay in loo adeegsado xaaladaha colaadaha hubaysan, mana khuseeyaan iskuullada iyo jaamacadaha loo adeegsaday ama ku burburay rabshadaha gudaha ama kacdoonka dadweynaha.

Hab-raaca waxa looga gol-leeyahay inuu caawiyo kuwa ku lugta leh qorsheynta iyo fulinta hawlgallada milateri, gaar ahaan go'aannada khuseeya adeegsiga iyo beegsiga xarumaha waxbarashada. Waxaa loo adeegsan karaa inuu gacan ka geysto tababarka ka hor inta aan ciidanka la dirin iyo hawlaha qorsheynta ee inta badan xoogga saaraya hawlgallada ciidan, iyo sidoo kale tababarka ku aaddan iskaashiga iyo wadashaqeynta milateriga iyo dadka rayidka ah. Si looga guul-gaaro ujeedadan iyo taageeridda hirgelinta tilmaamaha, ayaa Hab-raaca waxa uu tixgeliyaa faallada ku cad tilmaamaha oo ah[1]:

- Hab-raaca keliga ah, sida ku cad tilmaamaha, waxa uu xurmeynayaa sharciga caalamiga ah sida uu hadda u jiro. Hab-raacan waxaa looga gol-leeyahay inuu ka caawiyo dowladaha iyo ururada hubaysan ee aan dowliga ahayn inay diyaariyaan, oo ay hirgeliyaa hannaan wanaagsan oo ku haboon marxaladda ay ku jiraan. Waxaa la filayaa in ku dhaqanka Hab-raaca uu bedeli doono hab-dhaqanka dhinacyadaasi, taasoo keeni doonta difaacidda iskuullada iyo jaamacadaha xilliyada ay colaadu jirto, gaar ahaan in la yareeyo u adeegsigooda ujeedo ciidan ee dhinacyada ku lugta leh colaadda.
- Hab-raaca waxa uu ku salaysan yahay arimo laga guul-gaari karo, waxaana uu garawsan yahay in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay markasta wajahayaan xaaladdo adag oo u baahan xal wax ku ool ah.
- Qaabka waxa uu muujinayaa ficilllada wanaagsa ee iskuullada iyo jaamacadaha lagu difaaci karo xilliyada ay socdaan hawlgallada milateri, waxaana la rabaa inay adeegsadaan dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda. Tilmaamaha iyo Qaabkaba waxaa looga gol-leeyahay inay baahaan ayna hirgeliyaan dowladaha iyo ururada hubaysan ee aan dowliga ahayn ee qeybta ka ah dagaallada. Tilmaamaha iyo Qaabkuba waxay daneynayaan sida ugu wanaagsan ee loo difaaci karo xarumaha waxbarashada.

Ayadoo la qirayo in hawlgallada nabad ilaalinta, gaar ahaan kuwa ay ku lugta leeyihiin milateriga, booliska iyo rayidka nabada taageera ee qeybta ka ah faragelinta milateri, loo wajaho qaab ka duwan ciidamada caadiga ah, ayaa haddana kuwa adeegsanaya Hab-raaca waxaa lagu dhiiragelinayaa inay sida saxda u qaataan tilmaamaha iyo yoolka ah in la difaaco goobaha waxbarashada hawgal kasta oo socdaba.

---

[1]Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada, faallo ku aaddan tilmaamaha ka hortagga in ciidamada ay iskuullada iyo jaamacadaha adeegsadaan xilliyada dagaalladu socdaan
(Online: http://www.protectingeducation.org/sites/default/files/documents/commentary_on_the_guidelines.pdf. Accessed 22 November 2016)

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA)

GCPEA waa isbahaysi ay ku jiraan hay'ado badan, waxaana sanadkii 2010 asaasay ururada ka shaqeeya waxbarashada dalalka ay ka jiraan xaaladaha degdeg ah iyo kuwa ay saameeyeen colaadaha. Ururada xubinta ka ah GCPEA waxaa ku jira hay'addo ka shaqeeya difaacidda xuquuqda aadanaha iyo shuruucda caalamiga ah ee bani'aadannimada, kuwaasoo ka walaacsan weerarrada ka dhanka ah xarumaha waxbarashada, ardada iyo shaqaalaha ku sugan dalkaasi.

GCPEA waa mashruuc ay fulinayso xarunta Tides Center, oo ah urur aan faa'iido raadis ahayn oo fadhigiisu yahay Maraykanka, waxaana xukuma guddi joogta oo ka kooban hay'adaha caalamiga ee kala ah:

- Institute of International Education/IIE Scholar Rescue Fund
- CARA (Council for At-Risk Academics)
- Save the Children
- Human Rights Watch
- UNICEF
- Education Above All/Protect Education in Insecurity and Conflict
- UNESCO, iyo
- UNHCR

Isbahaysiga GCPEA ayaa sameeyay cilmi baaris ku aaddan saameynta ee leeyihiin weerarrada ka dhanka ah goobaha waxbarashada iyo adeegsiga milateriga ee iskuullada xilliyada ay dagaalladu socdaan, waxaana uu sameeyay tallaabooyin looga hortagi karo, loogana jawaabi karo dhibaatooyinkaasi. Isbahaysiga ayaa sidoo kale hogaanka u hayay ololaha caalamiga ah ee taageerada looga raadinayo Bayaanka Badqabka Iskuullada iyo hirgalinta *Tilmaamihiisa*.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan GCPEA waxaa laga heli karaa barta internet-ka ee www.protectingeducation.org.

Ururka The Roméo Dallaire Child Soldiers Initiative

Ururka Roméo Dallaire Child Soldiers Initiative waa iskaashi caalami ah oo ay ka go'an tahay in caalamka laga joojiyo adeegsiga carruurta loo qorto askarnimada. Ururka wuxuu isku daraa cilmi-baaris salka ku haysa xal la gaari karo, u ololeynta isbedel lagu sameeyo siyaasadaha wadamada iyo kuwa caalamiga ah iyo tababar wax ku ool ah oo uu u fidiyo laamaha ammaanka.

Qaabka aan horay loo arag ee uu ururkan ula shaqeeya milateriga, laamaha ammaanka iyo kuwa kale ee ka hawgala waaxdaasi – oo ah kuwa ugu badan ee lagala xiriiro karo carruurta askarta ah – ayaa muhiim u ah hakinta qorashada carruurta iyo inay ku biiraan xooggaga hubaysan. Barnaamijyada Dallaire Initiative ayaa waxaa laga qeybgaliyaa dowladaha ay khuseeyaan, hay'adaha caalamiga ah, laamaha ammaanka, aqoonyahannada, dadka ka shaqeeya arimaha bani'aadannimada iyo bulshooyinka.

Mac-hadka Qaramada Midoobay ee tababarka iyo cilmi-baarista (UNITAR) ayaa sanadkii 2012 u magacaabay ururka Dallaire Initiative khabiirka u qaabilsan carruurta askarta ah. Ururkan ayaa sidoo kale xubin ka ah guddiga joogta ah ee Paris ee carruurta iyo colaadaha hubaysan, oo ah mid taageersan 100-ka sharci ee addeegsiga awoodda, isla markaana wadashaqeyn ballaaran la leh UNICEF. Ururada kale ee wadashaqeynta la leh waxaa ka mid ah Midowga Afrika,NATO iyo xafiiska dacwad oogga ee Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ururka Dallaire Initiative waxaa laga heli karaa www.childsoldiers.org.

MOWDUUCYO

Farriin ka Socota Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada (GCPEA) 2

Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada 3

Ururka The Roméo Dallaire Child Soldiers Initiative.....4

Eray bixin.....6

Magacyo/erayo lasoo gaabiyay 8

Mahadcelin (waxaa dib ka buuxinaya GCPEA) 9

GUUDMAR.....10

UJEEDO 10

MACLUUMAADKA TABABARKA.....12

Khariiradda Tuulada 12

Wax ku baridda Khariiradda Tuulada – 13

Jaantuska Isdhexgalka 14

Iskuullada ama Jaamacadaha ku Yaal Deegaannada Hawlgalku Ka Socdo 16

Waxyaabaha Hagi Kara Qorsheynta Hawlgallada Milater 17

Waxyaabaha Qorshaynta Milatariga 17

Dhibaatooyinka ay leedahay in Iskuullada loo adeegsado dano milateri.....18

Tixgelinta Qaababka Qorsheynta iyo Tababarka Milateri 19

Waxyaabaha Hagi Kara Fulinta Hawlgallada Milater.....31

TILMAAMAHA KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN
XILLIYADA DAGAALLADU SOCDAAN 44

FALANQEYNTA NIDAAMKA SHURUUCDA CAALAMIGA AH EE KHUSEEYA IN MILATERIGA
UU ADEEGSADO ISKUULLADA XILLIYADA AY SOCDAAN COLAADAHA HUBAYSAN 46

Eray bixin

“Iskuullada iyo Jaamacadaha”

Erayadan waxaa loo adeegsadaa goobaha waxbarashada, magac kasta oo deegaankaasi looga yaqaanaba. Tusaale ahaan waxay noqon karaan xarumaha wax lagu baro carruurta aan gaarin dugsiga hoose, dugsiyada hoose ama dhexe, macaahidda, xarumaha waxbarashada sare sida jaamacadaha, kuleejooyinka, ama iskuullada lagu barto farsamada. Erayadan waxaa sidoo kale soo galaya dhulka ku dhegan xarumahaasi, iyo weliba dhismayaasha waxbarasho ee laga guuray ka dib markii ay soo wajahday khatar ammaan oo uga timid colaadda jirta. Balse waxaa eray bixinta ka reeban xarumaha lagu tababaro ciidanka, sida iskuullada tababarka askarta.

“Colaad hubaysan”

Eraygan waxa uu daboolayaa fekerka sharci ee “colaadda hubaysan ee caalamiga ah,” (si guud isu adeegsiga ciidamada hubaysan ee dalalka), iyo “colaadaha hubaysan ee aan caalamiga ah,” (xaalad dagaal hubaysan oo u dhexeeya dowlad iyo ururo aan dowli ahayn, ama ka dhex aloosan ururo hubaysan oo aan dowli ahayn). Si dagaal loogu tilmaamo inuu yahay colaad hubaysan oo aan caalami ahayn, waa inuu gaaraa heer weyn, mid ka mid ah ururada aan dowliga ahayna uu leeyahay ciidamo nidaamsan, talis hoos yimaada, awoodna u leh inay joogteeyaan hawlgalladooda ciidan.

“Xooggaga hubaysan ee qeybta ka ah colaadda hubaysan”

Eraygan waxaa loo adeegsadaa ciidamada dowladda iyo xooggaga hubaysan ee u dagaallamaya ururada aan dowliga ahayn, kuna lugta leh colaadda.

“U adeegsiga taageeridda dadaallada milateri”

Waxaa lagu micneyn karaa qaabab badan oo xooggaga hubaysan ee qeybta ka ah dagaalka ay uga dhigan karaan dhismayaasha iskuullada iyo jaamacadaha kuwo ay si kumeelgaar ah ama muddo dheer uga taageeraan dadaalkooda milateri. Waxaa ka mid ah in xarumaha waxbarashada loo adeegsado saldhig ciidan, goobo laga duulo ama difaac u ah ciidanka, keydka hubka iyo rasaasta, xabsiyo, xarumo lagu tababaro askarta; lagu qorto carruurta si ka baxsan sharciga caalamiga ah; goob laga sahmiyo; laga rido hubka ama laga hago madaafiicda marka la beegsanayo bartilmaameedka. Erayadina looma adeegsan karo marka ay askarta ilaalinayaan iskuullada iyo jaamacadaha ama ay waardiyo ka yihiin marka xarumahaasi loo adeegsanayo hawlo aan milateri ahayn sida doorashoyinka.

“Mas’uulka/La taliyaha/Qofka lagala xiriirayo / Difaaca Ilmaha”

Ereyadan waxaa loo adeegsadaa jagooyinka la xiriira arimaha difaaca carruurta. Mas’uuliyiinta difaaca carruurta ayaa sida caadiga ah waxaa magacaaba Qaramada Midoobay, waxaana ay toos u hoos tagaan madaxa waaxda difaaca carruurta ee Qaramada Midoobay u qaabilsan wadankaasi. La taliyayaasha iyo qofka lagala xiriirayo difaaca carruurta ayaa inta badan ah kuwo aanay magacaabin Qaramada Midoobay, waxaana ay la shaqeeyaan hay’adaha aan dowliga ahayn, ama dalalka ciidamada ku biiraya hawlgallada nabad ilaalinta. Shaqadooda ayaa ah fulinta iyo ku dhaqanka siyaasadaha difaaca carruurta iyo xaqiijinta in eedeymaha ku aaddan tacaddiyada ka dhanka ah carruurta la soo bandhigay, isla markaana laga jawaabay. Waxay sidoo kale mas’uul ka yihiin tababarrada ku aaddan siyaasadaha difaacidda carruurta, iyo wacyigelinta guud ee arimaha la xiriira difaacidda ilmaha ee dalalka qeybta ka ah hawlgalka, shaqaalaha iyo ururada ay kala dhexeyso wadashaqeynta.

“Masaafada uu hubka saameeyo”

Waxaa jira erayo badan oo loo adeegsan karo fogaanta masaafada uu hubka wax ka dili karo, haddii ay tahay tan qaraxa (gumaca qarxa), firirka (dhaawaca ka dhasha firirka hubka) ama dhaawaca ka dhasha walxaha uu qaraxa haleelay ama ku burburay. Erayadaasi waxaa ka mid ah “masaafada wax dilka” ama “masaafada qaraxa” iyo kuwo kale. Maadama ay kala duwan yihiin erayadaasi, uuna sidoo kale farqi u dhexeeya masaafada uu hubka kala duwan wax ka dili karo, waxaa adeegsan doonaa “masaafada uu hubka saameeyo” taasoo muujin doonta masaafada ugu fog ee uu hubka waxyeelo ka geysan karo. Xubnaha milateriga iyo taliyayaasha ayaa u baahan inay adeegsadaan qiyaastooda si ay go’aan uga gaaraan masaafada xaalad kasta.

Magacyo/erayo lasoo gaabiyay

AO:	Area of Operations: Deegaanka Hawlgalka
CO:	Commanding Officer: Taliyaha ciidanka
CPA/CPO:	Child Protection Advisor/Child Protection Officer: La taliyaha/Mas'uulka difaaca carruurta
CP Focal Point:	Child Protection Focal Point: Qofka lagala xiriirayo difaaca carruurta
DPKO:	Department of Peacekeeping Operations: Waaxda Hawlgalka Nabad Ilaalinta
IAW:	In accordance with: Si waafaqsan
IMPP:	Integrated Mission Planning Process: Hannaanka Iskudhafan ee Qorsheynta Hawlgalka
IO:	Information Operations: Hawlgallada Macluumaadka
JTFC:	Joint Task Force Commander: Taliyaha Ciidamada Iskudhafka ah
KLE:	Key Leader Engagement: La shaqeynta hogaamiyaha muhiimka ah
MRM:	Monitoring and Reporting Mechanism on Grave Violations against Children in Situations of Armed Conflict: Hannaanka Kormeeridda iyo Ka Warramidda Tacaddiyada Ka Dhanka ah Carruurta Ku Nool Xaaladaha Colaadda Hubaysa
NGO:	Non-Governmental Organization: Ururada Aan Dowliga Ahayn
OPLAN:	Operational Plan: Qorshaha Hawlgalka
PME:	Professional Military Education: Waxbarashada Xirfadeysan ee Milateriga
PIR:	Priority Information/Intelligence Requirement: Shuruudaha Macluumaadka Mudnaanta leh
ROE:	Rules of Engagement: Shuruucda Iska Horimaadka
SEA:	Sexual Exploitation and Abuse: Tacaddiyada Galmada
SOP:	Standard Operating Procedure: Nidaamka Hawlgalka ee Rasmiga Ah
SRSG:	Special Representative of the Secretary-General: Wakiilka Gaar ah ee Xoghayaha Guud
TTPs:	Tactics, Techniques and Procedures: Hannaanka, Farsamooyinka Iyo Xeeladaha
UN:	United Nations: Qaramada Midoobay
UNICEF:	United Nations Children's Fund: Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan carruurta
UNITAR:	United Nations Institute for Training and Research : Mac-hadka Qaramada Midoobay ee Tababarka iyo Cilmi-baarista
UNSC:	United Nations Security Council: Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay
UXO:	Unexploded Ordinance: Hubka Aan Qarxin

Mahadcelin (waxaa dib ka buuxinaya GCPEA)

Cilmi-baarista, soo saaridda iyo daabacaadda Hab-raacan lagu hirgelinayo *Tilmaamaha* waxaa suurageliyay taageerada deeqsimada leh ee PLEASE FILL IN AS APPROPRIATE. Isbahaysiga Caalamiga ah ee ka Hortagga Weerarrada ka dhanka ah Waxbarashada waxa uu sidoo kale u mahadcelinayaa oo maalgaliyay hawshan shakhsiyaadka, ururada, iyo shirkadaha kala ah: PLEASE FILL IN AS APPROPRIATE

Ugu dambeyn, isbahaysiga GCPEA waxa uu si weyn uga mahadnaqayaa toosinta, qoridda iyo taageerada uu hawshan ku bixiyay ururka Roméo Dallaire Child Soldiers Initiative, gaar ahaan Darin Reeves, oo ah agaasimaha tababarrada, iyo Dr. Shelly Whitman, agaasimaha fulinta, korneyl (shaqada ka fariistay) Jake Bell iyo gaashaanle Musa Gbow, oo AMISOM kala taliya difaacidda carruurta.

HAB-RAACA FULINTA *TILMAAMAHA*

Guudmar

In xooggaga hubaysan ay dano milateri u adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha ayaa waxa ay khatar gelinaysaa xarumahaasi waxbarasho, ardada iyo macallimiintaba. Sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada, in xarumaha waxbarashada oo ay tahay in la dhawro laga dhigo goobo saldhig ciidan ah, ama ay ku tababartaan, ama ay hubka ku keydsadaan, ama ay dadka ku xiraan ama ay ka duulaan, ayaa waxa ay xarumahaasi u bedelaysaa aag milateri.

Waxaa intaa dheer in ciidamada ama xooggaga hubaysan ee ku sugan ama u dhaw iskuullada ay si weyn u waxyeeleyn karto dadaallada lagu xaqiijinayo inay waxbarashada sii socoto xilliyada uu dagaalka jiro. In dhinaca kale uu beegsado ciidanka halkaa fadhiya, xataa haddii arinkaa uu waafaqsan yahay sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada, ayaa waxa ay khasaare aan loogu talagelin gaarsiin kartaa ardada iyo xarunta waxbarashada, halka joogitaanka ama dhawaanshaha ciidankana uu dhibaato ku yahay jawiga waxbarashada. Saameynta xun ee joogitaanka ama dhawaanshaha ciidamada ay ku yeelan karaan xarumaha waxbarashada ayaa si weyn looga ogaaday caalamka, ayadoo taa maanka lagu hayo, ayaa hab-raacan waxa uu doonayaa in si weyn loo dhawro loona difaaco xarumahaasi, ayadoo lagu darayo tababarka, qorsheynta iyo dhaqanka milateriga.

UJEEDADA

Hab-raaca waxa uu ka kooban yahay saddex qeybood oo ballaaran, mid kastana waxa uu ka hadlayaa baahida loo qabo xaqiijinta wadashaqeyn istaraatiji ah oo dhexmarta milateriga iyo dhinacyada rayidka ah:

a **Macluumaadka Tababarka:** Waxaa loogu talagalay inuu hago Waxbarashada Xirfadeysan ee Milateriga, haddii ay qeyb ka ahaan lahayd aqoon kororsi ama tababarka ka hor inta aan ciidanka la dirin. Waxa uu ka kooban yahay "Khariiradda Tuulada" iyo "Jaantuska Isdhexgalka", mid kastana waxa uu iskuullada usoo bandhigayaa marxalado kala duwan oo ka soo wajihi kara colaadaha hubaysan, waxaana loo qaabeeyay in loo adeegsado tababarka, laga shaqeysiiyo maskaxda, la falanqeyn oo la doodo ayadoo maanka lagu hayo in ciidamada iyo xooggaga hubaysan looga baahan yahay inay difaacaan goobaha waxbarashada. Waxyaabaha kale ee ku jira hab-raacan ayaa dhammaantood waxaa loo adeegsan karaa Waxbarashada Xirfadeysan ee Milateriga ama tababarka ka hor inta aan ciidanka la dirin;

b **Macluumaadka lagu hagi karo qorsheynta hawlgallada milateri:** Qeybtan waxaa loogu talagalay inay macluumaad muhiim ah siiso dadka ka shaqeeya qorsheynta ciidamada ee hawshoodu tahay isku-duba-ridka iyo fulinta hawlagallada ka dhacaya deegaanka ama qeyb ka mid ah deegaanka. Macluumaadkan waxay bixiyaan tixgelin muhiim ah oo ay tahay in taliyayaasha hawlgalka, shaqaalaha iyo kuwa qorshaha diyaarinaya ay ku daraan Hannaanka Qorsheynta Hawlgalka, sidaana ku xaqiijinaya tallaabooyinka lagu difaacayo goobaha waxbarashada, iyo in taasi ay qeyb muhiim ah ka tahay qorsheynta hawlgalka iyo dusha kala socoshada xeeladda diridda ciidanka. Macluumaadkan waxaa loo adeegsan karaa tababarka iyo in lagu hago diyaarinta mabaadii'a dowladda iyo ururada aan dowliga ahayn marka ay timaado difaacidda waxbarashada ee xaaladaha dagaalka; iyo

c **Macluumaadka lagu hago fulinta hawlgallada milateri:** Macluumaadkan waxaa lagu daraa jadwalka horay lagu xusay ee hagidda qorsheynta hawlgallada milateri, iyo weliba macluumaad cusub oo si gaar ah u khuseeya heerarka xeeladda ciidamada milateriga iyo booliska. Waxaa loo diyaariyay in laga dhigo buug yar oo jeebka lagu qaadan karo, si shakhsiyaadka uu ugu noqdo xigasho degdeg ah oo ay ka heli karaan tallaabooyinka ku haboon ee iskuullada, jaamacadaha iyo waxbarashada looga dhawri karo weerarrada iyo saameynta xun ee kasoo gaari karta dagaallada. Macluumaadkan waxa ay bixinayaan qaabab lagu taliyay oo muhiim u ah tixgelinta iyo ficiladda, loogumana talagalin in ay meesha ka saaraan awaamirta talis ee dowladda iyo ururada aan dowliga ahayn.

Hab-raacan waxa loogu talagalay milateriga dowladda, ciidamada u tababaran sida milateriga, ee la geeyay ama la geyn rabo goobaha uu dagaalka saameynta ku yeeshay ama ku yelaan karo guud ahaan waxbarashada, gaar ahaan iskuullada iyo jaamacadaha. Sida kor lagu sharraxay, waxaa loogu talagalay Waxbarashada Xirfadeysan ee Milateriga ama tababarka ka hor inta aan ciidanka la dirin, waxaana uu faa'iido u leeyahay istaraatijiyada, xeeladaha iyo hawlgalkaba. Ururada aan dowliga ahayn ayaa sidoo kale ka faa'iideysan kara hab-raacan, maadaama ay iyagu yihiin kuwo markasta ay kusoo jeedaan indhaha beesha caalamka, gaar ahaan hab dhaqankooda dagaallada hubaysan.

Hab-raacan waxaa sidoo kale loogu talagalay inuu taageero hawlgallada nabada, laga billaabo diridda tira kooban oo ah milateri aan hubaysneyn, cutubyo boolis ah ilaa guutooyinka milateri. Maadaama ay yihiin macluumaad waxbarid, waxaa la rajaynayaa in la adeegsado, la hormariyo isla markaana lagu daro hormarinta khibradaha hawlgalka, waxna laga barto. Ayadoo taa maanka lagu hayo, ayaa dadka adeegsada hab-raacan waxaa lagu dhiiragelinayaa inay soo gudbiyaan aragtidooda ku aaddan iyo talooyinkooda si loosii wanaajiyo hab-raaca.

Si qaab sahlan loogu xigto, loona adeegsado Hab-raaca, ayaa *tilmaamaha* iyo falanqeyn ku saabsan shuruucda caalamiga ah ee la xiriirta adeegsiga milateri ee iskuullada xilliyada uu dagaalka jiro, waxaa lagu daray hab-raacan ayagoo ah Lifaaqa I iyo II.

Hab-raacan waxaa haga mabaadii'da muhiimka ah ee hoos ku xusan kuwaasoo laga soo qaaday *Tilmaamaha:*

a Ilaalinta astaamaha rayidnimo ee xarumaha waxbarashada, haddii xarumahaasi loo adeegsaday dano milateri, waa in dib loo dayactiro si ay u gutaan hawlihii waxbarasho ee loogu talagalay. (Hordhac, Tilmaamaha 1 iyo 2);

b Taxadiradda ka hor inta aan la weerarrin xarumaha waxbarashada (Tilmaanta 4 iyo ilaa xad Tilmaanta 3); iyo

c Difaacidda xarumaha waxbarashada ee khatarta ugu jira in la weerarro ayadoo aan la waxyeeleyneyn xaaladooda rayidnimo (Tilmaanta 5).

MACLUUMAADKA TABABARKA

Waa in khariiraddan tuuladan gundhig looga dhigaa doodaha ku aaddan iskuullada ku yaal deegaannada uu ka socdo dagaalka. Ka qeybgalayaasha waa in loo kala qeybiyaa kooxo si ay uga niqaashaan xaaladaha la muujiyay, iyo saameynta la arkay. Qodobada laga doodayo waa inay ku jiraan adeegsiyada kala duwa ee lagu muujiyay khariiradda, iyo saameynta ay ku yeelan karaan guud ahaan carruurta; ardada; macallimiinta iyo gebi ahaanba bulshada rayidka ah; saameynta ay ku yeelan karto bulshada oo dhan; iyo waxyaabaha kale ee ka dhalan kara. Dooddaasi guud ka dib, waxaa qeybaha dambe ee hab-raacan looga hadli doonaa qaababka hawlgallada iyo xeeladaha ku haboon sidii weerarrada looga difaaci lahaa waxbarashada, iskuullada iyo jaamacadaha.



Qodobada laga baran karo khariiradda tuulada –
Laga billaabo bidix qeybta kore:

ISKUUL SHAQEYNAYA (Rubaca sare ee bidix)
FIIRO: Waa in ardada iyo shaqaalaha si aan xadidaad lahayn loogu oggalaadaan gudaha iyo dibedda iskuulka iyo weliba garoomadiisa. Lagama samayn karo agagaarka iskuulka saldhigyo, ama dhaqdhaqaaq milateri. Marka la qorsheynayo samaynta xarumaha ciidanka roondada ah, baraha koontorool ama xarumaha keydinta hubka, waa in la xaqiijiyaa in iskuullada ay ka baxsan yihiin masaafada uu gaari karo hubka ciidankaasi. Waa in ayada oo la kaashanayo maamulka madaniga ah la sameeyaa qaab xilli hore lagu wargelin karo iskuullada xaalad ammaan ee jirta, si loo xaqiijiyo badqabka ardada iyo macallimiinta.

ISKUUL AY ADEEGSANAYAAN XOOGGAG HUBAYSAN (Rubaca sare ee midig)
FIIRO: Waxaa Ardada iyo shaqaalaha laga horjoogsaday isticmaalka iskuulka, taasoo abuurtay firaaq waxbarasho. Xataa haddii xooggaga hubaysan ay adeegsanayaan qeyb ka mid ah iskuulka, taasi waxa ay khatar galinaysaa ardada iyo macallimiinta maadaama ay ku sugan yihiin masaafada uu gaari karo hubka haddii lasoo weerarro goobtaasi. Sidoo kale, haddii adeegsiga qeyb ka mid ah iskuulka ay ka dhigto xarun ciidan oo la beegsan karo, waxay taasi markale khatar galinaysaa noolasha ardada iyo macallimiinta. Ku sugnaanshaha ciidan ee iskuullada shaqeynaya ayaa waxa ay ardada iyo macallimiinta usoo jiidaa khatarta ah in askar ahaan loo qorto, la handado ama loo geysto tacaddiyo galmo. Waa in weerar kasta oo ka dhan ah iskuullada ay adeegsadaan xooggaga hubaysan laga horreysiiyaa digniin ah in iskuulka aan waxbarasho loo adeegsan karin. Waxaa la tixgelin karaa adeegsiga awood muujin[2].

ISKUUL KU BURBURAY COLAAD HUBAYSAN (Rubaca hoose ee midig)
FIIRO: Waxaa Ardada iyo shaqaalaha laga horjoogsaday isticmaalka iskuulka, taasoo abuurtay firaaq waxbarasho. Waxaa loo baahnaan doonaa dayactiri uu kharas badan ku baxo ka hor inta aan waxbarashada caadi lagu soo celin. Waxaa loo baahan yahay ururinta walxaha aan qarxin iyo xaqiijinta in hub milateri aanu oolin goobta, ka hor inta aan iskuulka si badqabta dib loogu adeegsan.

ISKUUL AY ADEEGSANAYAAN XOOGGAG HUBAYSAN (Rubaca hoose ee bidix)
FIIRO: Waxaa Ardada iyo shaqaalaha laga horjoogsaday isticmaalka iskuulka, taasoo abuurtay firaaq waxbarasho. Waa in weerar kasta oo ka dhan ah iskuullada ay adeegsadaan xooggaga hubaysan laga horreysiiyaa digniin ah in iskuulka aan waxbarasho loo adeegsan karin. Waxaa la tixgelin karaa adeegsiga awood muujin.

[2] Awood muujin waa hab uu milateriga ku xallin karo xaalad hawlgal asagoo aan si toos ah u weerarrayn dhinaca kasoo horjeeda, waxaana ka mid ah dab rid iyo qaabab kale oo dhoolatus ah.

Iskuul ama Jaamacad ku yaal Deegaan Hawlgal

Jaantuska Isdhexgalka: Waa in la sameeyaa tababaro ku salaysan xaalado, kuwaasoo qeyb ka ah tababarka milateri ee lagu dhisayo hogaanka ciidan iyo weliba tababarka ka hor inta aan ciidanka loo dirin hawlgal gaar ah. Si *Tilmaamaha* loogu daro hab dhaqanka milateriga, waa in loo soo bandhigaa tusaalooyin kuwaasoo lagu darayo tababarka isla markaana dhiiragelinaya in xeeladaha, qaababka ciidan, qorsheynta heerka hawlgal iyo hagidda istaraatijiyadda laga mid yeelo tixgelinta iskuullada iyo waxbarashada.



LAMA ADEEGSAN KARO, xataa hadduu si kumeelgaar ah u xiran yahay, ama fasax yahay.

Ku dar Qorshaha Hawlgalka difaaca xarumaha waxbarashada iyo wadooyinkooda.

LAMA ADEEGSAN KARO ilaa laga waayo xal kale, waxaana markaa la adeegsan karaa inta laga gaarayo ujeedada milateri ee laga leeyahay. Haddii ay suuragal tahay waa inuu ansixiyaa taliska ugu sarreeya.

Xaqiiji in rasaasta ciidamada xulafada ah lagu adeegsaday goobtan. Xaqiiji inaan laga tegin waxlaha qarxa.

Ku dar Qorshaha Hawlgalka difaaca xarumaha waxbarashada iyo wanaajinta ammaanka si dib loogu adeegsado iskuullada.

Haddii ay suuragal tahay In lagala hadlo ciidamada dowladda/kuwa taabacsan joojinta u adeegsiga milateri ee iskuulka.

Xaqiiji in laga saaray dhammaan agabka milateri.

Ku wargeli hay'adaha rayidka ah, booliska iyo bulshada marka dib loo billaabi karo waxbarashada iskuulka.

Haddii la ogaado fal cadownimo ah, awood ayaa la adeegsan karaa si la isu difaaco, ayadoo laga taxadarayo yareynta khasaaraha soo gaaraya shacabka. Waxaa la adeegsan karaa awood muujin.

Haddii aan la ogaan fal cadownimo ah, iskuulka waxaa loo adeegsan karaa dano milateri halka uu ku yaal awgii, balse waxaa la beegsan karaa un inta uu sidaa yahay. Waa in la tixgeliyaa waxbarashada mustaqbalka marka la go'aansanayo qaabka weerarka.

Haddii uu muuqdo milateri, u dig inuu dagaal kusoo wajahan yahay haddii aanu meesha ka guurin.

Waa in weerrarka laga taxadaro si loo yareeyo khasaaraha gaari kara xarunta, ardada iyo macallimiinta.

Kala tali khatarta hay'adaha rayidka ah, hogaanka deegaanka, booliska iyo macallimiinta.

Jaantuska Isdhexgalka – Sii Qeexidda Tixgellino Muhiim Ah

Tixgellino Muhiim Ah– Jaamacad ama Iskuul Shaqeynaya

- Maadaama ay yihiin hanti shacab oo la dhawray, iskuullada ama jaamacadaha shaqeynaya looma adeegsan karo dano milateri. Waxaa taa ku jira kuwa sida kumeelgaarka ah u xiran ama kuwa fasaxa ah.
- Dhinacyada isku haya colaadda ma adeegsan karaan awood ama sasabasho kale si ay maamulka waxbarashada ugu qanciyaan in xarumaha la xiro si loogu adeegsado dano milateri.
- In xiriir lala sameeyo hay'adaha rayidka ah, gaar ahaan wasaaradaha waxbarashada, hay'adaha aan dowliga ahayn, bulshada deegaanka, iyo booliska maxalliga ah si loo xaqiijiyo inay jiraan qorshayaal lagu sugayo ammaanka waxbarashada, dhismayaasha iyo wadooyinka ardada iyo macallimiintaba ay maraan.
- In dusha lagala socdo iskuullada iyo wadooyinka ay maraan ardada iyo macallimiintaba ayadoo aan deegaannada ku dhaw laga abuureyn joogitaan milateri.
- In hay'adaha rayidka ah iyo booliska deegaanka lala diyaariyo qorshaha Ciidan Degdeg u Hawlgala.

Tixgellino Muhiim Ah– Jaamacad ama Iskuul aan Shaqeyn ama Laga Guuray

- Maadaama ay yihiin hanti shacab oo la dhawray, iskuullada ama jaamacadaha looma adeegsan karo dano milateri. Xaaladaha is difaaca ama marka aan laga fursan karin oo keliya ayaa iskuullada loo adeegsan karaa ujeedooyin milateri. Waxaana markaa la adeegsan karaa inta laga gaarayo ujeedada milateri ee laga leeyahay.
- Xaqiijinta in xarunta waxbarasho ay horay u adeegsadeen xooggag hubaysan. Haddii ay taa dhacday, waa in hay'adaha rayidka ah gaar ahaan wasaaradda waxbarashada, booliska iyo hogaanka deegaanka looga digaa adeegsiga xarunta ilaa iyo inta laga xaqiijinayo badqabkeeda.
- Waa in xiriir lala sameeyaa farsama yaqaannada milateri si loo xaqiijiyo badqabka xarunta. Haddii loo baahdana ay meesha ka saaraan walxaha aan qarxin, hubka laga guuray iyo makhaasiinnada hubka.
- Marka xarumahaasi dayactirka lagu sameeyo, in lagu wargeliyo hay'adaha rayidka ah gaar ahaan wasaaradda waxbarashada, booliska iyo hogaanka maxalliga ah in iskuulka dib loo furi karo. In lagula taliyo hay'adahaasi dayactirka loo baahan yahay, laamaha ammaanka ee maxalliga ahna (haddii ay jiraan, ayadoo maanka lagu hayo in iyagaba la beegsan karo) lagala xiriiro qorsha ammaan ee loo baahan yahay ama jira ee lagu difaacayo waxbarashada.

Tixgellino Muhiim Ah – Iskuullada ama Jaamacadaha ay adeegsadaan Dhinacyada Qeybta ka ah Colaadda Hubaysan

- Haddii ay suuragal tahay, uga dig xooggaga cadowga ah adeegsiga iskuulka ama jaacamadda, haddii ay diidaanna in lagu weerarri karo. Kula tali hay'adaha rayidka ah, kuwa ammaanka iyo hogaanka deegaanka inaan loo dhawaan xarumahaasi ilaa iyo inta laga xaqiijinayo ammaankiisa.
- Waa la ogol yahay in la iska difaaco weerarrada ay cadowga kasoo qaadaayaan iskuullada ama jaamacadaha, balse waa in si taxadar leh loo falceliyaa si loo yareeyo burburka dhismaha ama waxyeellada soo gaari karta ardada iyo macallimiinta. Haddii ay suuragal tahay waa in la adeegsadaa awood muujin.
- Marka la fulinayo weerarka waa in la sameeyaa taxadar kasta oo lagu yareynayo burburka dhismayaasha ama khasaaraha soo gaari kara ardada iyo macallimiinta, ayadoo la eegayo xilliga weerarka, hubka la adeegsanayo iyo adeegsiga qaab bedel u noqon kara awood adeegsiga.[3]

---

[3] Borotokool I dheeraadka ah, qodobka. 57.

MACLUUMAADKA LAGU HAGI KARO QORSHEYNTA HAWLGALKA MILATERI

Waa in taliyayaasha hawlgalka, shaqaalahooda iyo kuwa qorshaha dejinaya ay xisaabta ku darsadaan in goobaha ay hawlgalka ka fulinayaa ay ku yaallaan iskuullo, jaamacado iyo xarumo kale oo waxbarasho. Macluumaadka soo socda waxaa loo diyaariyay inay noqdaan tixraac iyo tallooyin lagu daro hannaanka qorsheynta hawlgalka, maadaama loo baahan yahay in difaacidda waxbarashada ay qeyb muhiim ah ka noqotaa qorsheynta hawlgalka iyo diridda ciidamada. Macluumaadkan waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa tababarka iyo in lagu hago wanaajinta dhaqanka ciidanka marka ay timaado difaacidda waxbarashada ee goobaha ay dagaalladu ka socdaan.

Qorsheynta Milateri:

Saraakiisha qorsheynta ee milateriga ayaa mabaadii'da soo socda u adeegsan kara sii shaqeynta xarumaha waxbarashada ee ku yaal goobaha ay colaadda ka jirto:

1. Marna looma oggala ciidamada iyo xooggaga hubaysan inay adeegsadaan iskuullada ama jaamacadaha. Waa in si gaar ah loo tixgeliyaa iskuullada ay waxbarashada ka socoto, laguna dadaallaa in aan ciidan la dhigin meel uu hubka ka gaarayo xaruntaasi waxbarasho.
2. Haddii ciidan uu go'aansado inuu adeegsado iskuul ama jaamacad laga guuray, maadaama aanay fursad kale u furneyn, uuna ku sugnaanayo inta uu ka gaarayo ujeedada milateri, waxaa qasab ah in la garawsado in iskuulka ama jaamacadda ay dhinaca kale u arki karaan xarun ciidan iyo bartilmaameed sharci ah, waana in sida ugu dhaqsaha badan loogu celiyaa maqaamkeedii rayidnimo.
3. Asagoo aqbalaya isbedelka ku yimid maqaamka xaruntaasi, waa in ciidanka degan uu dusha u ritaa mas'uuliyadda dayactirka ay xarunta u baahan tahay marka ay ka baxayaan iskuulka ama jaamacaddahore, waxaana ka mid ah inuu meesha ka saaro dhammaan hubka aan qarxin, uuna aqbalaa khasaaraha soo gaaray dhismaha ama dadka inta ay xaruntaasi ahayd saldhigga ciidan. Sidoo kale, ciidanku waa inuu uga digaa dadkii horay u adeegsan jiray isbedelka ku yimid xarunta waxbarasho gaar ahaan ardada, macallimiinta iyo shacabka kale.
4. Haddii ciidan uu degan yahay ama adeegsanayo iskuul ama jaamacad, waa inuu ka ilaaliyaaa burbur, isla markaana u diiddaa inay adeegsadaan dadka rayidka ah.
5. Waa in ciidanka adeegsanaya ama degan iskuulka ama jaamacaddauu fududeeyaa sidii ardada iyo macallimiinta ay waxbarashadooda ugu sii wadan lahaayeen goob kale oo ammaan ah, asagoo arintaa la kaashanaya hay'adaha rayidka ah.
6. Ma weerarri karaan xooggaga hubaysan iskuul ama jaamacad aan laga dhigin xarun ciidan, maadaama taasi ay ka dhigantahay xadgudub ka dhan ah mabda' kala soocidda ee ku xusan xeerka colaadaha hubaysan, sidoo kalena loo yaqaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada, waxaana falkaasi lagu tilmaami karaa dembi dagaal[4]. Weerarka noocaasi ah waxa uu ka mid noqon karaa tacaddiyada waaweyn ee lixda ah ee ku xusan Hannaanka kormeerka iyo ka warramida ee Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ("MRM")[5] – ee khuseeya dalalka laga hirgeliyay.
7. Waa in ciidamada dowladda ay taliskooda qaran ku wargeliyaan weerarrada ka dhanka ah iskuullada iyo jaamacadaha, adeegsiga iskuullada ee ciidamada dowladda iyo kuwa kale ee hubaysan, hakad gelinta waxbarashada ee ciidamada dowladda iyo kuwa kale ee hubaysan ee ka dhaca deegaannada ay collaada ka jirto. Haddii ay suuragal tahay, waa in sidoo kale falalkaasi lala socodsiiyaa hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay iyo/ama maamullada waxbarashada ee heer deegaan iyo heer qaranba.

---

[4] Qodobada 8(2)(b)(ix) iyo 8(2)(e)(iv) ee xeerka Rome ee ay ku dhisan tahay Maxkamadda Dembiyada Caalamiga ah.

Dhibaatooyinka ka dhasha in iskuullada loo adeegsado dano milateri:

Iskuullada ayaa si weyn usoo jiidan kara xooggaga hubaysan sababo kala duwan awgood. Waxa ay leeyihiin qolal waaweyn oo ay degi karaan askarta, kuna keydsan karaan qalabkooda, goobo ay dad badan isku nadiifin karaan, qaarkoodna waxa ay leeyihiin kushiin iyo goobo lagu cunteeyo. Haseyeeshee waxaa jira dhibaatooyin badan oo ka dhalan kara in xooggaga hubaysan ay adeegsadaan iskuullada, haddii ay ahaan lahayd in laga dhigto saldhig ciidan, goob lagu keydiyo hubka ama saadka, goob wax laga waardiyeeyo ama qaabab kale. Waxaa dhibaatooyinkaasi ka mid ah:

1. Iskuullada ama jaamacadaha ay qeyb ahaan ama gebi ahaanba saldhigyada ama xarumaha keydka u adeegsadaan dhinacyada dagaallamaya ayaa noqon kara bartilmaameed milatero. Weerarrada ay dhinaca kale ku qaadaan xarumahaasi ayaa waxaa ka dhalan kara khasaare weyn, gaar ahaan dhaawac iyo dhimasho soo gaara dadka rayidka ah, iyo burbur ku yimaada dhismayaasha. Sidoo kale, waxaa khatar ba'an ay soo wajahaysaa ardada iyo macallimiinta, gaar ahaan marka la soo weerarro ciidanka ama xooggaga hubaysan ee halkaa fadhiya.
2. U adeegsiga iskuullada iyo jaamacadaha ee danaha milateri waxay horseedi kartaa burbur soo gaara dhismayaasha iyo inay lumaan qalabka waxbarashada.
3. Kuwa loo diidday waxbarashada – ka dib markii ay burbureen iskuulladooda ama laga saaray si loogu adeegsado ujeedooyin milateri – ayaa sii kordhin kara dhibaatooyinka ka dhashay colaadda sida sinnaan la'aanta dhaqaalaha iyo shaqa la'aanta, waxaana arimahaasi ay fursad u siinayaan dhinaca kale ee dagaallamaya inay qortaan carruurta, taasoo caqabad dheeraad ku ah xal u helidda colaaddaasi.
4. In dadka rayidka ah, gaar ahaan ardada iyo macallimiinta lala wadaago goobaha waxbarashada ee loo adeegsanayo ujeedooyinka milateri, ayaa loo arki karaa in dadkaasi laga dhiganayo gaashaan – waxaana ka dhalan kara dembi dagaal iyo/ama mid ka mid ah tacaddiyada waaweyn ee lixda ah ee ku xusan hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay. Haddii guddiga MRM awood loo siiyo inuu baaro tacaddiyadaasi, waxaa ay ka diyaarinayaan warbixintooda, taasoo horseedi karta in ururka mas'uulka ka ah lagu shaaciyo warbixinta sanadlaha ah ee Xoghayaha Guud uu kaga hadlo carruurta ku sugan goobaha colaadda iyo in beesha caalamka ay cunaqabateyn saarto ururkaasi. [6]
5. In iskuullada shaqeynaya lala wadaago ardada iyo macallimiinta ku sugan ayaa waxa ay shacabkaasi la dhawray usoo jiidaysaa khatar ballaaran oo jirka iyo maskaxdaba ah oo uga timaada colaadda. Waxaa ka mid ah khatarta tacaddiyada galmada, iyo in carruurta ay ku biiraan xooggaga hubaysan. Labadaas xadgudub waxaa ka dhalan kara dembi dagaal iyo/ama mid ka mid ah tacaddiyada waaweyn ee lixda ah ee ku xusan hannaanka MRM ee Qaramada Midoobay. Haddii guddiga MRM awood loo siiyo inuu baaro tacaddiyadaasi, waxaa ay ka diyaarinayaan warbixintooda, taasoo horseedi karta in ururka mas'uulka ka ah lagu shaaciyo warbixinta sanadlaha ah ee Xoghayaha Guud uu kaga hadlo carruurta ku sugan goobaha colaadda iyo in beesha caalamka ay cunaqabateyn saarto ururkaasi. In iskuulka lala wadaago ayaa sidoo kale ka dhex dhalin karta ardada inay colaadda u arkaan wax caadi ah.

---

[5] Waxaa asaasay Xoghayaha Guud ka dib codsi uga yimid Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay oo ku xusnaa Qaraarka 1612, MRM waa guddi ka hawlagal dalalka ay colaaddu saamaysay, waxaana hogaanka u haya UNICEF iyo wakiilka Qaramada Midoobay u fadhiya dalkaa. Guddigu waxa uu mas'uul ka yahay baaritaannada iyo inuu macluumaad lagu kalsoonaan karo ka bixiyo xadgudubyada sharci ee ku aaddan tacaddiyada waaweyn ee lixda ah ee xuquuqda carruurta, kuwaasoo haddii la ogaado horseedi kara jawaab ka timaada Qaramada Midoobay. Asagoo ka duulaya macluumaadkan, ayaa Xoghayaha Guud waxa uu khudbaddiisa sanadlaha ah ku magacaabi karaa dhinacyada colaadda ku lugta leh ee carruurta qorta, dila, dhaawaca, kulana kaca tacaddiyada galmada iyo afduubka, kuwa weerarra iskuullada iyo cisbitaallada, si loogala hadlo inay soo afjaraan tacaddiyadaasi. (Barta internet-ka ee http://www.unicef.org/protection/57929_57997.html). Qaraarka Golaha Ammaanka ee tirsigiisu yahay 1998 ee ku aaddan difaaca carruurta ku sugan goobaha colaaddu ka jirto, si buuxdana la isugu raacay 12-kii July 2011, ayaa Goluhu waxa uu Xoghayaha Guud ka codsaday in kuwa weerarra iskuullada iyo cisbitaallada, haddii ay ahaan lahaayeen ciidamada dowladda iyo xooggaga hubaysanba, lagu daro kuwa galay "tacaddiyada waaweyn" ee ka dhanka ah carruurta. (Macluumaadka Tilmaamaha Qaraarka 1998: https://childrenandarmedconflict.un.org/publications/AttacksonSchoolsHospitals.pdf).

[6] Bogga internet-ka ee UNICEF(http://www.unicef.org/protection/57929_57997.html)

6 In iskuullada shaqeynaya lala wadaago ardada iyo macallimiinta ku sugan ayaa meel ka dhac ku noqon karta sharciga dagaallada ee ka dalbanaya xooggaga hubaysan inay sida ugu wanaagsan u difaacaan shacabka, ayna ka baaqsadaan in xarumaha ciidan ay ka sameeyaan meel u dhaw goobaha ay dadka ku badan yihiin.

7 Iskuullada iyo Jaamacadaha ayaa si sahlan looga aqoonsan karaa khariiradaha iyo qalabka jiheeyaha ah ee GPS-ka, waxaana si fudud u beegsan kara xataa askariga aan lahayn tababarka wanaagsan.

8 Iskuullada ayaan si wanaagsan loo difaacin maadaama inta badan ay leeyihiin wadooyin badan oo soo gala ama ka baxa, isla markaana dhismayaashooda ay ka samaysan yihiin walxo aan celin karin hubka awoodda dhexe iyo kan culus.

9 Ciidanka deggan iskuulka ayaa khatar weyn wajihi kara maadaama askar badan ay uga sugan yihiin goob si sahlan loo aqoonsan karo, isla markaana lagu qaadi karo weerar cirka iyo dhulka ah.

10 Weerar ka dhan ah iskuul, haddii aan loo bedelin xarun ciidan, ayaa ka dhignaan kara dembi dagaal.[7] Waxaa taasi ka mid ah in awood ciidan loo adeegsado si ardada iyo macallimiinta looga saaro iskuulka, ka dibna loogu adeegsado ujeedooyin milater.

11 In ciidan la dejiyo iskuul ama jaamacad ama loo adeegsado ujeedo kale oo milateri ayaa waxa ay bulshada deegaanka iyo beesha caalamkaba u arki karaan xadgudub ka dhan ah carruurta halkaa ku nool iyo waxbarashadooda. Taa bedelkeeda, waxaa fursadaasi ka faa'iideysan kara dhinaca kale oo adeegsan kara dacaayad ku aaddan falkaasi.

This list is by no means exhaustive, and additional disadvantages to the military use of schools will exist. What should be appreciated from this list, and any additional disadvantages that will be determined, is that any perceived advantages to using schools for military purposes are easily discounted, and should be dismissed. For this reason, armed forces and groups are best served by avoiding any use of schools during armed conflict.

Tixgelinta Nidaamka Tababarka iyo Qorsheynta Milateri

Qodobada soo socda ayaa loogu talagalay inay gacan ka geystaan qorsheynta si loo gaaro ujeedada ah in laga hortago faragelinta hannaanka waxbarashada inta ay colaaddu jirto.

A. Qorshee in aadan degin iskuullada

Hawlgal kasta oo milateri ayaa u baahan qorsheyn ku filan si looga guul gaaro. Hannaanka qorsheynta ee OPP sidoo kalena loo yaqaan Hannaanka Isku dhafka ah ee Qorsheynta Hawlgalka ("IMPP") ama Hannaanka Go'aan Qaadashada Milateri (MDMP) ayaa looga baahan yahay inuu tixgeliyo shuruudaha tasiilaadka ciidanka, gaar ahaan halka uu hubka ku keydsanayo iyo halka ay askartu ku hoyanayaan, si looga baaqsado in loo baahdo dhismayaasha iskuullada iyo jaamacadaha.

Marka laga hadlayo iskuul ama jaamacad kasta, tilmaamuhu waa kuwo cad: **ciidanku ma degi karo, umana adeegsan karo qaab kale.** Ayadoo la garawsanayo xaqiiqada iyo sida aan loo sii ogaan karin hawlgallada milateri, ayaa haddii la go'aansado in aan laga maarmi karin faa'iidada xeeladeed ee uu ciidanka ka heli karo iskuullada ama jaamacadaha laga guuray, waxaa loo baahan yahay in ugu yaraan habkan la raaco:

[7] Isla masdarka (HIVR) qodobka 23.

Waa in taliyaha goobta ku sugan uu sida ugu dhaqsaha badan arinta ku wargeliyaa taliska dhexe. Haddii uu waqtiga saamaxayo, waa in ogolaanshaha laga helaa taliska dhexe ka hor inta aan la adeegsan xarunta waxbarasho.

Waa in warbixinta uu taliyaha dirayo lagu cadeeyaa qodobadan:

1 Xaaladda dhalisay in la adeegsado xarunta waxbarasho, iyo qiyaastii mudada la isticmaalayo. Waa in goobaha waxbarashada uu ciidanku ku sugnaadaa mudada ugu yar, dibna loogu celiyaa maqaamkeedii rayidnimino marka ugu horreysa ee ay xaaladdu saamaxdo;

2 Dhammaan tallaabooyinka la qaaday balse suurageli waayay si looga baaqsado adeegsiga xarunta waxbarasho;

3 Dhammaan tallaabooyinka la qaaday si loogu wargeliyo dadkii xarunta adeegsan jiray, gaar ahaan ardada iyo macallimiinta in goobta loo bedelay mid ciidan. Looma ogolaan karo askarta iyo hubkooda inay adeegsadaan xarunta waxbarasho xilli ay ku sugan yihiin ardada iyo macallimiinta, maadaama ay taasi naftooda khatar gelinayso haddii lasoo weerarro xarunta;

4 Dhammaan tallaabooyinka la qaaday si loo xafido qalabka yaalla goobta waxbarashada, gaar ahaan kuraasta, buugaagta iyo waxyaabaha kale;

5 Dhammaan daallada la sameeyay si loo xaqiijiyo in adeegyada waxbarashada iyo fursadaha kale ay kasii socdaan deegaanka ku tiirsanaa xarunta.

Ka dib marka xarunta laga gaaro ujeedada milateri ee laga leeyahay, waa in sida ugu dhaqsaha badan loo gudbiyaa waxbixin si buuxda uga hadlaysa dayactirka lagu sameeyay, burburka loo geystay, jiritaanka hubka aan qarxin iyo kan khatarta ah ee u baahan in meesha laga saaro, iyo sidoo kale talooyin ku aaddan dayactirka xarunta. Tani waa waajib saaran dadalka qeybta ka ah Borotokoolka 2003 ee Haraadiga Walxaha Qarxa ee dagaalka (Borotokool V ee Xeerka CCW ee 1980).[8] Waa in lagu dadaalaa sidii bulshada deegaanka iyo xooggaga mucaaradka ah loogu wargelin lahaa in xarunta lagu celiyay maqaamkeedii waxbarasho, waana in qorshaha lagu taageerayo ammaanka iskuulka ay qeyb ka ahaadaan dadka ay khuseyso waxbarashada iyo hay'adaha ammaanka ee rayidka ah.

Waa in hogaanka milateriga uu sida ugu haboon adeegsiga goobta waxbarashada ku wargeliyaa guddiga MRM ee Qaramada Midoobay iyo/ama hay'adaha qaran ee qaabilsan waxbarashada.

Haddii ay suuragal tahay, waa in hay'adaha rayidka ah iyo/ama kuwa aan dowliga ahayn ee lagu kalsoon yahay loo oggalaadaan inay qiimeeyaan xaaladda xarunta colaadda ka dib.

Waa in ayadoo la kaashanayo hay'adaha rayidka ah iyo/ama kuwa ka shaqeeya xuquuqda carruurta ee lagu kalsoon yahay iskuulka dib loogu celiyaa hawshiisii hore marka ay ciidamada ka baxaan.

[8] Barta internet-na: https://ihl-databases.icrc.org/applic/ihl/ihl.nsf/Treaty.xsp?documentId=22EFA0C23F4AAC69C1256E280052A81F&action=openDocument

Goobaha Milateri

Waa waxyaabaha qaabkooda, goobtooda, ujeedadooda ama adeegsigooda uu gacan ka geysan karo hawlgalka ciidan, halka burburintooda guud ama qeyb ahaan, qabsashadooda ama ka taqalusidooda, ayadoo la eegayo xaaladda markaa jirta, ay keeni karto guul milateri.

AP I, Art 52.2

* Waxyaabahaasi waxaa ka mid ah balse aanay ku koobneyn dhismayaasha, kaabayaasha sida wadooyinka, khadadka tareennada, gawaaridda, IWM.

*Tani kama dhigna talo sharci. Waa in markasta ay saraakiisha talo sharci weydiistaan dadka leh xirfadda sharciga.

B. Ka Taxadar Weerarridda Iskuullada Loo Aqoonsaday Goobo Milateri

Ayadoo maanka lagu hayo waxa loola jeedo goob milateri, waa in la tilmaamaa in joogitaanka ama u adeegsiga ujeedo milateri aanay iskuul ama jaamacad u bedelayn goobo ciidan. Inkastoo ay iskuulka sidaa ku tilmaami karaan dhinaca kale ee mucaaradka ah, marka la eego goobta uu ku yaal ama qaabka loo adeegsado, ayaa haddana burburintiisa ama qabsashadiisa aanay u yeelan doonin faa'iido milateri xaaladda markaa jirta. Si taliyayaasha ay go'aan uga gaaraan arintaasi, waxa ay u baahan yihiin talada sharci yaqaanka qeybta ka ah hawlgalka.

Haddii iskuul ama jaamacad ay degaan ama adeegsadaan xooggaga hubaysan, sidaana loogu arko goob milateri, waxaa qasab ah in la sameeyo tallaaba kasta oo looga gaabsanayo khasaaraha aan loo baahneyn ee ka dhalan kara weerarridda xaruntaasi. Ka hor inta aan la qaadin weerar, waxaa muhiim ah in ugu yaraan la tixgeliyo qodobadan:

1. Si loo hubiyo in goobta ay ku sugan yihiin dad rayid ah, gaar ahaan ardada iyo macallimiinta, waa in la helaa macluumaad muhiim ah oo faahfaahsan ama wax u dhigma, sidoo kalena waa in la xaqiijiyaa in goobta ay ku sugan yihiin ciidan daandaansi wada (tiradiisa, hubka uu haysto, awooddiisa, iwm) iyo waxa dhiirigelinaya.
2. Haddii ay xaaladdu saamaxayso, waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa xilliga la qaadayo weerarka si loo yareeyo dhimashada iyo dhaawaca soo gaari kara dadka rayidka ah ama burburka ku iman kara dhismayaashooda.
3. Waxaa la tixgelin karaa adeegsiga Hawlgalka Macluumaadka ku salaysan, si xooggaga degan ama adeegsanaya iskuulka loogu qanciyo inay dadka rayidka ah meesha ka saaraan ama iyaguba ka guuraan iskuulka.
4. In la adeegsado awood muujin, ayadoo la diyaarinayo ciidan, dab rid ku samaynaya meel ka baxsan aagga iskuulka ama dhoolatus cirka ah samaynaya.
5. In lag hortago khasaaraha aan loo baahneyn inta uu socdo weerarka.
6. In la diiwaangeliyo saameynta uu reebay weerarka, haddii ay suuragal tahayna, in hay'adaha rayidka ah iyo/ama kuwa aan dowliga ahayn ee lagu kalsoon yahay loo oggalaadaan inay qiimeeyaan xaaladda xarunta colaadda ka dib.
7. Waa in hogaanka milateri uu sida ugu macquulsan weerarka ula socodsiiyaa guddiga MRM ee Qaramada Midoobay iyo/ama hay'adaha kale ee deegaanka iyo qaranka u qaabilsan waxbarashada. Maadaama aragti xun laga dhaxli karo khasaaraha ka dhasha weerarrada iskuullada, ayaa in xilli hore la aqoonsado in xarunta loo bedelay goob milateri waxa ay gacan ka geysataa in laga gudbo fekerka xun ee ay arinta ka qaadi karaan shacabka iyo daacayadda ay abuuri karaan dhinaca kale.

C. La Shaqee, Lana Agaasin Hawlwadaagayaasha

Si loo joogteeyo hannaan waxbarasho oo shaqeynaya, waa in ardada ay helaan jawi ammaan ah oo ay iskuulka ku iman karaan, goob ammaan ah oo ay wax ku baran karaan, iskuulka ama jaamacadana ay haystaan macallimiin iyo qalab waxbarasho. Xooggaga milateri ee edebta iyo mas'uulnimada leh waxa ay ku lug yeelan karaan ammaanka deegaanka, balse sida lagu qeexay *Tilmaamaha*, waa in sida ugu macquulsan ay uga baaqsadaan inay askar geeyaan gudaha iskuullada si ammaankooda loo sugo. Sidoo kale, inkastoo ay jiri karaan isdhexgal aan rasmi ahayn oo ay xubnaha xooggaga milateri la yeelan karaan macallimiinta iyo askarta, waa in aan la ogolaan in isdhexgalkaasi uu sii ballaarto maadaama taasi ay khatar toos ah ku tahay dadkaaso rayidka ah, oo loo arki karo inay taageero u muujinayaan ciidanka, ama lagu waxyeeleyn karo u dhawaanshahooda milateriga.

Tani kama dhigna in saraakiisha qorsheynta milateri ay iska indha tiraan jiritaanka iskuullada ee deegaanka hawlgalka. Taa bedelkeeda, waa in jiritaanka iskuullada, iyo qorshaha lagu kaashanayo hay'adaha ammaanka ee maxalliga ah, kuwa ka shaqeeya xuquuqda carruurta iyo kuwa bulshada lagu daraa qorsheynta hawlgalka. Si la mid ah sida qorsheynta hawlgalka loogu tixgeliyo cisbitaallada iyo goobaha cibaadada, waa in mid taa ka weyn loo sameeyaa iskuullada. Taliyayaashu waa inay ogaadaan xarumaha ay tahay inaanay ka dagaallamin gudahooda ama agagaarkooda, isla markaana ay isha ku hayaan goobahaasi si ay u xaqiijiyaan in aanay adeegsan dhinaca kasoo horjeeda. Haddii ay dhacdo in khatar la geliyo, ama weerar lagu qaado iskuulka, waa in la sameeyaa qorsho xakameyn ah si loo xaqiijiyo in jawaab-celinta lagu difaacayo goobta waxbarasho ay tahay mid ku filan.

Tixgelinta in iskuullada iyo nidaamka waxbarashada lagu biiriyo hannaanka qorsheynta milateri ayaa u ogolaanaysa hogaanka ciidanka iyo saraakiisha qorsheynta inay ku daraan jihooyinka amarradooda, sidaa awgeedna ciidanka oo dhan gaarsiinaya ujeedada taliyahooda. Wa in ciidamada iyo qorshahooda milateri ay ahaadaan ku taageeraya ama haddii ay suuragal tahay kabaya dadaallada ay wadaan shacabka ama hay'adaha caalamiga ah ee ka shaqeynaya adeegyada gurmadka, bani'aadannimada iyo hormarinta. Shaqeynta iskuullada iyo sugidda ammaanka deegaannadooda ayaa lagu gaari karaa oo keliya marka la kaashado hay'adaha waxbarashada, gaar ahaan wasaaradda qaran ee waxbarashada, hogaamiyayaasha waxbarashada ee heer deegaan iyo heer gobol, madaxda bushada iyo hay'adaha ku hawlan xuquuqda carruurta. Iskaashiga noocaasi ah waxa uu gacan ka geysan karaa xoojinta tayada waxbarashada ee colaadda ka dib, maadaama uu taageerayo in caadi laga dhigo tacliinta, uuna mas'uuliyad iska saarayo xuquuqda waxbarashada ee ay carruurtu leeyihiin. Inkastoo la fahmi karo in xooggaga milateri aanay macluumaadka oo dhan la wadaagi karin hay'adaha rayidka ah, sababo ammaan iyo hawlgal awgood, ayaa haddana waxaa muhiim ah in sida ugu wanaagsan loo kaashado hawlwadaagayaasha rayidka ah.

Sidaa awgeed, waxaa muhiim ah in hogaanka sare ee milateriga uu dowr muhiim ah ka qaataa jiritaanka iskuullo iyo xarumo waxbarasha oo ka shaqeynaya deegaanka hawlgalka, isla markaana heerarka ku haboon ula shaqeeyaa mas'uuliyiinta rayidka ah ee deegaanka. Inkastoo askariga shakshiga ah aanu wax dowr ah ku lahayn iskuullada, ayadoo la eegayo awoodda amartay hawlgalka milateri, ayaa dhanka kale hogaanka sare ee milateri waxay mas'uuliyad ka saaran sugidda ammaanka si loo xaqiijiyo in waxbarashada ay socoto.

D. Ku Samee Qiimeyn Wadajir ah Hannaanka Waxbarashada

Waa in Isfahan laga gaaraa hannaanka waxbarasho ee ka jira deegaanka hawlgalka, kaasoo qeyb ka ah Iskaashiga Rayidka iyo Milateriga (CIMIC) ee la qaabeeyay lana qorsheeyay, isla markaana u dhexeeya hogaanka sare ee milateriga iyo dhinacyada rayidka ah ee ay ka midka yihiin bulshada deegaanka iyo maamulka. Waxaa isfahankaasi loogu baahan yahay si loo xaqiijiyo in waxbarashada ay sii socoto, in la ogaado khatarta ammaan ee ku iman karta, iyo sidoo kale in lala socdo falalka lagu beegsanayo hannaanka waxbarashada – iskuullada, ardada iyo macallimiinta. Waxaa qasab ah in la ogaa xaaladda dhabta ah ee ay ku sugan yihiin xarumaha waxbarashada iyo sida uu yahay ammaanka deegaanka. Tusaale ahaa, haddii dhismaha goobta waxbarashada uu wanaagsan yahay, balse ardada aanay ka iman karin guryahooda amni darro awgeed, markaa lama gaarin yoolka ah xaqiijinta waxbarashada carruurta. Dhanka kale, haddii dagaalku yahay mid wajiyo badan oo ciidamada dowladda aanay difaaci karin shacabka, gaar ahaan carruurta iyo waxbarashada, waxaa loo baahan yahay in go'aan laga gaaro xaaladda ammaan iyo cidda ugu wanaagsan ee xaqiijin karta badqabka iskuullada. Waxaa arintan qeyb ka noqonaya fahanka

ujeedada xooggaga dagaallamaya (kuwa dowladda iyo kuwa aan dowliga ahayn), awoodda ay u leeyihiin in fuliyaan ujeedadooda iyo taageerada ay ka haystaan shacabka, gaar ahaan nidaamkooda maamul ee rasmiga ah iyo kana an rasmiga ahayn. Sidaa awgeed, waa in xooggaga milateri ay kala shaqeeyaan hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah ee waxbarashada, kuwa ammaanka iyo ururada kale ee ay arinta khuseyso sidii loo qiimeyn lahaa xalaadda, isla markaana go'aan looga gaari lahaa goobaha khatarta ku jira ee ka tirsan deegaanka hawlgalka, si loo fududeeyo qorshayaasha. Waa in la tixgeliyaa:

1. Xaaladda xarunta waxbarashada: Liiska hoos ku xusan ayaa ah mid fudud oo uu buuxin karo qof kasta oo eegaya xarunta. Ma aha qiimeyn faahfaahsan oo ku aaddan qaab dhismeedka xarunta, balse waxa uu bixin karaa macluumaadka loo baahan yahay ee xarunta si go'aan looga gaaro in loo adeegsan karo waxbarasho iyo mudada lagu diyaarin karo si loo adeegsado.
2. Ammaanka Muuqda: Waxa uu ku salaysan yahay goobta iyo ammaanka asaasiga ah ee dhismaha sida (deyrka, iwm) sidee ugu sahlan ayaa lagu sugi karaa ammaanka xarunta iyo waxyaabaha loo baahan yahay?
3. La degan yahay: Dhismuhu ma yahay mid la degan yahay, dano milateri ama kuwo kale loo adeegsanayo guud ahaan ama qeyb ahaan? Ma waxaa loo adeegsanayaa arimo ka baxsan waxbarashada, sida inay degan yihiin dadka soo barakacay, ama adeegyada gurmadka degdeg ah? Haddii ay waxbarasho ka socoto, ardada iyo/ama macallimiinta ma gudihiisa ayay ku nool yihiin (tusaale ahaan, iskuul la jiifto)? Iskuulku ma yahay mid si joogta ah u shaqeeya ama xilliyada qaar shaqeeya (sanad dugsiyeedka, xilliyada fasaxa ah, iwm)? Ayadoo la eegayo cidda degan iskuulka, ayaa maamulka sharciga ah ee ku haboon waxa uu dadkaasi ka saari karaa goobtaasi (xataa asagoo adeegsanaya awood) si loogu celiyo ujeedada waxbarasho ee laga lahaa.
4. Shaqeynta: Iskuulku ma yahay mid hadda shaqeynaya? Haddii aanay deganeyn ciidamo hubaysan, maxay tahay sababta aan loogu isticmaaleyn xarun waxbarasho? Sababaha macquulka ah waxaa ka mid ah kharash la'aan, macallimiin la'aan ama xaaladda ammaan.
5. Xarumo Bedel ah: Ma jiraan xarumo kale oo lagu sii wadi karo waxbarashada sida kuwa bulshada, iwm?
6. Dhaqanka Deegaanka: Halkee ayay ka yimaadaan ardada iyo macallimiinta, qaab noocee ah ayay kusoo gaaraan iskuulka? Dalalka qaar, ardada waxa ay iskuulka u lugeeyaan masaafo 30 KM ah ama ka badan, waxaana ay ku sugnaadaan muddo. Tani waa arrin muhiim u ah qorsheynta, gaar ahaan khatarta iman karta iyo deegaannada ay tahay in la xasiliyo. Waxa ay keentaa in ammaanka xarunta waxbarashada laga dhigo mid 24-saac ah. Macallimiintu miyay ka carareen iskuulka? Mala sugay ammaanka wadooyinka iskuulka? Waxaa khiyaar wanaagsan noqon kara in mas'uuliyiinta waxbarashada iyo kuwa deegaanka lagu dhiirageliyo inay baahiyaan nidaamka waxbarashada oo ay gaarsiiyay bulshada oo dhan si loo xaqiijiyo ammaanka ardada iyo macallimiinta ilaa iyo inta ay ka hagaagayso xaaladda ammaan. Sidoo kale, waa noocee ardada iskuulka – (wiilal keliya, gabdho keliya ama isku jir)? Meeqa ayay u dhexeysaa da'dooda? Ayadoo la eegayo xaaladda hawlgalka, gaar ahaan deegaannada ay ku badan yihiin qorashada iyo adeegsiga carruurta askarta ah, ayaa arimahan waxa ay muhiim u yihiin fahanka xaaladaha khatarta ah iyo qaabka loola tacaali karo. Sidoo kale, waa in la garawsadaa, qorshahana lagu darsadaa dhaqanka deegaanka, waxyaabaha qofka looga baahan yahay iyo filashadooda.
7. Maamulka: Waa kuwee hay'adaha taageera iskuulka? Ma mid ay dowladda maalgalisaa ama waxaa gacanta ku haya hay'ad aan dowli ahayn, mid gaar loo leeyahay ama urur diimeed? Ma ballanqaadeen inay dayactirayaan? Maamulka ma yahay mid soo jiidanaya khatar uga timaada ururada mucaaradka ah ee deegaanka?
8. Manhajka: Ma iskuul diineedbaa mise mid calmaani ah? Manhajkiisu ma waxa uu taabacsan tahay urur bulsho? Khatar ma ka dhalan kartaa manhajka ama qaabka waxbarasho ee iskuulka? Inkastoo hogaanka milateriga looga baahan yahay inuu taageero iskuullada, asaga oo aan eegeyn manhajkooda (haddii aanay abuureyn walaac ammaan – taasoo haddii ay jirto loo baahan yahay in lagala hadlo mas'uuliyiinta rayidka ah) ayaa fahanka manhajka iyo qaabka uu u saameyn karo ammaanka waxa uu u adeegsan karaa qorshihiisa iyo xogtiisa sirdoon.

9 Heerka Iskuulka iyo Qeybaha Ardada: Maxay yihiin fasalada/da'da ardada iskuulka? Ayadoo la eegayo qaabka ay carruurta u qortaan ururada hubaysan ee ka dagaallama deegaanka, ayaa iskuullada waxay u nuglaan karaan weerarrada iyo in carruurta laga qorto ayadoo lagu salaynayo da'da iyo jinsigooda.

10 Khatarta: Maxay tahay khatarta ammaan ee ka jirta deegaanka? Xooggaga hubaysan miyay beegsanayaan carruurta ama shaqaalaha si ay uga qortaan iskuullada? Ma waxaa la beegsadaa marka ay u socdaan ama ka imanayaan iskuulka? Ma xiisad beeleed ama diimeed ayaa ka jirta deegaanka? Ma waxaa jira koox isku dayaysa inay bedesho fekerka bulshada ayadoo koontoroolaysa nidaamka waxbarasho ama iskuul gaar ah? Ma waxaa jira walaac ku aaddan burcad iyo dembiyo kale?

11 Adeegyada Ammaanka ee La Heli Karo: Maxay yihiin adeegyada diyaarka ah ee lagu sugi karo ammaanka iskuullada? Ma jiraa boolis la isku halayn karo oo sugi kara ammaanka xarunta waxbarasho? Miyay iskuulka iyo bulshada ku xeeran diyaariyeen hannaan digniin ah oo lagu ogaan karo xooggaga hubaysan ama khatarta kale ee kusoo aaddan carruurta? Ma jiraan dad ku filan oo loo tababaro ama u tababaran inay sugaan ammaanka xarunta ama carruurta iskuulka usoo socota? Ma jiraa ciidan leh awood uu ku xakameeyo xooggaga hubaysan ee ku sugan deegaanka?

Aragtida heer gobol: Marka macluumaadka la ururiyo (tusaale qorshaha ururinta ee hoose), waxaa si muuqata loogu soo bandhigi karaa khariirad muujinaysa sawirka guud, waxaana laga aqoonsan karaa deegaannada khatarta ku jira ee u baahan in dhaqaale loo qoondeeyo. Ka feker adeegsiga hannaanka midabada ee uu ku shaqeeyo samafaraha (Casaan: waxa uu ka dhigan yahay khatar saraysa oo ku wajahan waxbarashada colaadda awgeed – waxaa loo baahan yahay tallaabooyin lagu difaacayo waxbarashada; Jaalle: waxa uu ka dhigan yahay khatar heer dhaxaad ah oo ku wajahan waxbarashada colaadda awgeed – waa in la diyaariyaa qorshe lagu difaacayo waxbarashada, waxaana loo baahan yahay dusha kala socoshada iyo qaabka digniinta hore bixiya ayadoo lala kaashanayo hay'adaha rayidka ah ee qaabilsan waxbarashada; Cagaar: waxa uu ka dhigan yahay khatar heerkeedu hooseeyo oo ku wajahan waxbarashada colaadda awgeed – waa in la joogteeyaa wadashaqeynta iyo xiriirka lala leeyahay hay'adaha waxbarashada ee rayidka ah). Tani waxa ay sahlaysaa in adeegga ammaanka ee kooban loo qoondeeyo ayadoo mudnaanta la siinayo meelaha ugu daran.

Tirada	**Degmada**	**Magaca iskuulka/ nooca**	**Goobta loolka, dhigaha iyo Habraaca milateriga**	**Xaalad Cagaar ah (dayactir yar, ka yar 48 saac)** **Jaalle(dayactir dhaxaad ah, 2-3 todobaad)** **Casaan (dayactir ballaaran, in ka badan 3 todobaad)**	**La degan yahay** **(yaa degan?)**	**Shaqeynaya**

Hababka ugu fiican: Hannaanka xog tebinta ee aqoonsada hababka ugu wanaagsan ee la jaanqaadi kara xaaladaha ayaa gacan ka geysan doona hagaajinta qorshaha. Sidoo kale, waa in tababarka la siinayo ciidanka laga doonayo inay diyaariyaan waxbixinnada, ka dibna adeegsadaan uu ahaado mid xoogga lagu saarayo ujeedada iyo muhiimadda ka dambeysa warbixinnadaasi, gaar ahaan in xogtu ahaato mid sax ah oo dhexdhexaad ah si taliyayaasha ay u fahmaan dhaqanka waxbarasho ee dadka.

Bedel ah	**Dhaqanka deegaan**	**Xarun tababar loo bedelay iskuul**	**Kafaale qaade**	**Manhaj**	**Khatar maxalli ah**	**Ciidamada ammaanka ee deegaanka**

D.1. Liiska Wadaaga ah ee Qiimeynta Iskuulka– Shuruudaha Macluumaadka Mudnaanta leh (PIR)

1. Goobta – loolka. Dhigaha. Habraaca milateriga
2. Degmo/tuulo
3. Magaca iskuulka iyo noociisa
4. Xaaladda iskuulka-cabirka, jihada, qaabka(sawirro haddii ay jiraan)

A. Xaaladda guud iyo qalabka dhismaha

B. Saqaf

C. Daaqado iyo albaabbo

D. Musqulo

E. Guryaha/kushiinnada

F. Jiritaanka gidaarka ammaanka

G. Masaafada u dhexeysa dhismayaasha kale ee waxbarashada, qaabka deegaanka ama tuulada (haddii ay suuragal tahay ku dheji sawirka goobta)

H. Xaaladda alaabta/qalabka tababarka

I. Dayactirka degdega ah ee ay u baahan yihiin si loogu shaqeeyo

5. Iskuulka ma la degan yahay, yaase deggan? Yaa amar u siiyay? Ma ogyihiin taariikhda ay ka guurayaan?
6. Iskuulku ma shaqeynayaa? Haddii aanu shaqeyneyn, maxay tahay sababta?
7. Deegaanka ma ku yaallaan dhismayaal kale oo si kumeelgaar ah iskuul u noqon kara?
8. Ardada iyo shaqaalaha iskuulka xagey ku nool yihiin, qaabkee ayayna kusoo gaaraan? Ma iskuulka ayay seexdaan?
9. Iskuulku ma leedahay cid kafaalad qaaday? Ma joogaan? Maamulka maxalliga ah wax xiriir ah ma la leeyahay kafaalad qaadaha?
10. Manhajka iskuulka ma diinibaa mise calmaani?
11. Maxay tahay khatarta la isleeyahay wax ku wajahantahay iskuulka ama deegaanka?
12. Ciidamada ammaanka ee deegaanka, ma boolisbaa? Ama ururada difaaca bulshada, iwm?
13. Macluumaad kale.

E. Samee qorsho wadajir ah oo lagu sii wadayo waxbarashada deegaannada ay colaadda ka jirto

Ayadoo la eegayo in la diyaariyay qorsho carruurta lagu keenayo iskuullada si ay wax u bartaan, ama waxbarashada loogu fidinayo deegaannadooda, ayaa waxaa loo baahan yahay nidaam iskaashi oo lagu sugayo ammaanka wadooyinka ay ardada maraan iyo xarumaha waxbarashada. Waa in la adeegsadaa Qaabka La shaqeynta Hogaamiyaha Muhiimka ah (KLE) ee u dhexeeya taliyayaasha ciidan iyo mas'uuliyiinta waxbarashada ee rayidka ah, si loo xaqiijiyo wadashaqeynta iyo in lagu dhiirageliyo mas'uuliyiinta rayidka ah inay hantiyaan bixinta waxbarashada iyo arimaha la xiriira. Nidaamkan waa inuu ku salaysnaadaa mabaadii'da Digniinta, Ammaanka, Jawaab-celinta iyo Ka Warramidda.

1. Digniinta: Qaabka ugu wanaagsan ee lagu difaaci karo iskuullada iyo waxbarashada ayaa ah in laga hortago khatarta kusoo foolka leh si loo yareeyo khasaaraha soo gaari kara ardada iyo macallimiinta, isla markaana aanay usoo gaarin dhibaatada. Waxaa muhiim ah in la helo qaab si wax ku ool ah loogu ururiyo xogta oo isku xiraya bulshada iyo hawlwadaagayaasha waxbarashada, isla markaana lagu taageerayo qaab sahlan oo lagu wada xiriiri karo si loo muujiyo khatarta kusoo aaddan bulshada isla markaana loo dalbado kaalmo ammaan. Waa in la diyaariyaa qalab digniinta bixiya oo ay dadka rayidka ah maamulaan si shacabka loogu wargeliyo xaaladaha khatarta ah ee soo kordhay, si ay u feejignaadaan ayna ugu oggalaadaan laamaha ammaanka inay ka jawaab celiyaan. Waa in la dhiirageliyaa tallaabooyinka iskaashiga ah ee lagu taageerayo in hay'adaha rayidka ah ee xuquuqda carruurta iyo nidaamka waxbarashada ay ardada iyo macallimiinta baraan habka sugidda ammaanka shakhsiga ah (carar – goobta xir– dhuumo), iyo in dadka waaweyn ee ay ku kalsoon yihiin ay ku wargeliyaan dhaqdhaqaaqa aan caadiga ahayn.
2. Amni Joogta ah: Booliska deegaanka, waa haddii uu jiro, ayay saaran tahay mas'uuliyadda sugidda ammaanka iskuullada joogta ah iyo xarumaha kumeelgaarka ah ee waxbarashada. Sidoo kale, waa in la tixgeliyaa ammaanka garoomada ama goobaha ciyaaraha ee ay carruurta aadaan xilliyada aanu iskuulka jirin, balse aan sida tooska ah xiriirka ula lahayn goobta waxbarasho. Waxaa sidoo kale la adeegsan karaa shirkadaha ilaalada gaarka ah ee lagu kalsoon yahay, balse waa in si weyn looga taxadaraa hubinta xubnaha ilaaladaasi iyo anshaxooda. Khiyaarka ugu dambeeya waa in la tababaro dadka deegaanka si ay u sugaan ammaanka xarumaha waxbarashada. Waxaa sidoo kale la adeegsan karaa in ciidamada hubaysan ay dusha kala socdaan iskuullada, ayagoo roondeynaya wadooyinka ay maraan ardada iyo macallimiinta iyo sidoo kale afaafka hore ee iskuulka ama jaamacadda, haseyeeshee sugidda ammaanka deegaanka iyo ka digidda khatarta waa arin looga baahan yahay shacabka ama hay'adaha ammaanka ee maxalliga ah. Waa in qofkasta oo hub ku dhex haysta iskuullada – ha ahaado ilaalo shacab ah, boolis ama milateri – uu hubiyaa badqabka hubkiisa, iyo in carruurta aanay gacanta ku dhigin hubkaasi. Waa in laga baaqsadaa in iskuulka ay dhex joogaan ciidan, haddii aanay si weyn lagama maarmaan u ahayn.
3. Jaawaab celinta: Ayadoo la eegayo inta ay dhantahay khatarta, waa in booliska ama milateriga ama labaduba ay sameeyaan Ciidanka Jawaab-celinta Degdega ah si ay uga jawaab celiyaan dhibaatada ama khatara ka dhanka ah iskuullada, ardada iyo macallimiinta. Waa in marka la diyaarinayo qorshaha hawlgalka iyo waxqabadka dibedda lagu daraa qaabka lagu ogaanayo in loo baahan yahay Ciidanka Jawaab-celinta Degdega ah iyo heerka ay gaarsiisan tahay jawaab-celinta. Waxaa muhiim ah in dusha lagala socdo wadooyinka ay maraan ardada iyo macallimiinta, maadaama laga ogaan karo khatarta soo aaddan.
4. Ka warramidda: Waxaa muhiim ah diyaarinta waxbixin looga warramayo sida wax u dhaceen iyo tallaabooyinka ay qaadeen xooggaga ammaanka si loo ogaado qaabka ugu wanaagsan ee looga xeeladaysan karo khatar kasta oo cusub. Waxa ay sidoo kale warbixinta macluumaad siinaysaa guddiga MRM ee Qaramada Midoobay si uu Golaha Ammaanka ugu wargeliyo tacaddiyada waaweyn ee ka dhanka ah carruurta, gaar ahaan weerarrada lala beegsado waxbarashada.

F. Tusaale qaabka diyaarinta warbixin – Ka dib weerarrid ama milateri adeegsaday iskuul ama jaamacad

Goobta Iskuulka (Tilmaanta Grid, GPS, Caalamado dhuleed muhiim ah)		Magaca Iskuulka – nooca – faahfaahinta				
Maamulka Iskuulka		Nooca xarunta iskuulka			Jinsiga ardada	
Dowlad ☐	Hay'ad aan dowli ahayn ☐	Hoose/dhexe ☐	Tababar ☐	Garoon ☐	Lab ☐	Dhedig ☐
Bulsho ☐	Nooc kale ☐	Sare ☐	Nooc kale ☐	Jaamacad ☐	Isku jir ☐	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:						
Nooca weerarka:		Weerar lagu qaaday ardada/ macallimiinta		Ciidamo degan/adeegsanaya ☐ Tiradooda:_____		
Duqeyn/hoobiye ☐		Duqeyn cirka ah ☐		Hubka fudud ☐	Xatooyo/dhac ☐	Gubid ☐
Qorasho ☐		Afduub ☐	Walxaha qarxa ☐	Weerar is qarxin ah ☐	Tacaddiyo galmo ☐	Hubka wax gumaada ☐
Waqtiga maalinta		Subax ☐	Duhur ☐	Galab ☐	Habeen ☐	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:						
Tilmaanta falka cidda geysatay – dowlad ama urur aan dowli ahayn (Mid goobo geli)				Tirada dembiilayaasha (haddii la ogyahay):		
Khasaaraha muuqda ee ka dhashay weerarka:						
Gebi ahaanba burburay ☐		Qeyb ahaan burburay ☐		Burbur yar ☐		Midna ☐
Macluumaad:						
Xarunta ma u xirantay weerarka awgii?			Maya ☐	Haa ☐	_____ Maalmood	
Macluumaad:						

* Looguma talagelin waxbixintan inay qeyb ka noqoto go'aanka lagu weerarrayo iskuullada ama jaamacadaha loo bedelay xarumaha ciidan, balse waxaa loola jeedaa in lagu diiwaangeliyo weerarradaasi si ay gacan uga geysato hannaanka MRM ama kuwa la midka ah. Waa in askarta la baro qaabka loo buuxiyo warbixintan iyo in sababta loogu baahan yahay macluumaadkan ay tahay in taliyaha uu fahmo dhaqanka waxbarashada ee deegaanka.

Waa in si gaar ah loo diiwaangeliyo faahfaahinta ardada iyo shaqaalaha waxbarashada ee la dilay, dhaawacmay ama la qortay.

Khasaaraha bani'aadannimo ee ka dhasha weerarka waxbarashada Jinsiga ardada

Khasaaraha bani'aadannimo ee ka dhasha weerarka waxbarashada				Jinsiga ardada	
Arday miyaa la dilay?	MAYA ☐	HAA ☐	Wadar _____	Lab _____ Dhedig _____	Isku jir ☐ _____
Arday miyaa la dhaawacay?	MAYA ☐	HAA ☐	Wadar _____	Lab _____ Dhedig _____	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:					
Macallimiin miyaa la dilay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	Isku jir ☐ _____
Macallimiin miyaa la dhaawacay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:					
Arday miyaa la qortay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	
Macluumaad:					

MACLUUMAADKA LAGU HAGI KARO FULINTA HAWLGALKA MILATERI

Qeybtan waxaa ku diyaarsan macluumaad loogu talagalay inay ka mid noqdaan tababarka, hagidda dhaqanka ciidanka iyo weliba tixraaca marka la fulinayo hawlgallada milateri. Waxaa loogu talagalay in lagu daabaco warqado la eg cabirka (15 x 20 cm) si askarta ay u qaataan una adeegsadaan marka ay joogaan goobta dagaalka, ama marka ay qaadayaan falal ay isku difaacayaan ama ku weerar tegayaan.

BOGGA KOOBAAD- (DHANKA HORE):

A	Qiimee xaaladda – Iskuulku ma yahay mid ay waxbarasha ka socoto, saldhig u ah ciidamada (xulafada ama cadowga), ama ma yahay mid laga guuray?
D	Go'aan ka gaar *Tilmaamaha* loo baahan yahay.
A	Go'aanso tallaabada aad qaadayso – Maxaan sameynayaa oo waafaqsan shuruucda iska horimaadka, sharciga, awaamirta sharciga ah iyo tababarka la i siiyay?
P	Sida ugu haboon u fuli tallaabada aad go'aansatay – Xasuuso tababarkaagii, oo adeegso xirfaddaada, aqoontaada, iyo hab dhaqankaaga si aad uga guul gaarto hawlgalka, adigoo sida ugu macquulsan u kaashanaya *Tilmaamaha*.
T	Warbixin dir – Taliskaaga uga warbixi xaaladda, gaar ahaan maclu-umaadka aad hayso, *Tilmaamaha* aad adeegsatay, si ay u wargeliyaan ayna ula shaqeeyaan hay'adaha ay arintaa khuseyso ee ku lugta leh dusha kala socoshada xadgudubyada loo geysto *Tilmaamaha*.

BOGGA LABAAD (DHANKA HORE):

NIDAAMKA KU AADDAN DIFAACIDDA ISKUULKA IYO JAAMACADDA

Tilmaamaha: Iskuullada iyo jaamacadaha ("iskuullada") waa inay ahaadaan goob waxbarasho oo la ilaaliyay, halkaasoo ay carruurta ku dareemaan ammaan ay tacliin ku heli karaan isla markaana ku hormarin karaan maskaxdooda. Ciidamada iyo xooggaga hubaysan ayaa ujeedadaasi khatar geliya marka ay iskuullada u adeegsadaan danahooda, sidaana ay ku noqdaan qeyb ka mid ah furimaha dagaalka. Joogitaanka ciidamada ee iskuullada ayaa waxa uu khatar galiyaa ardada iyo macallimiinta, waxayna sababi karaan in xarumaha waxbarashada ay noqdaan kuwo aan tacliinta laga raadsado oo aan ammaan ahayn.

1. Waajibaadkaaga ugu guddo si sax ah oo waafaqsan sharciga;
2. Marka laguu ogol yahay inaad adeegsato awood, u adeegso si macquul ah oo aad ku gaari karto ujeedadaada;
3. Marwalba u dhaqan si naxariis iyo xushmad leh. Qof kasta ula dhaqan si isku mid ah, adigoo aan ku takooreyn isirkiisa, dalkiisa, beeshiisa, midabkiisa, diintiisa, jinsigiisa, da'diisa, waxa uu ka aaminsan yahay jinsiga kale, iyo caafimaadkiisa jirka ama maskaxda;
4. Ilaali hantida, gaar ahaan tan loo adeegsado waxbarashada iyo hawlaha bani'aadannimada;
5. Samee wax kasta oo looga hortagi karo waxyeello hantida shacabka kasoo gaarta colaadda, gaar ahaan hantida loo adeegsado waxbarashada iyo hawlaha bani'aadannimada. Waxaa mamnuuc ah in hanti lagu qabsado ama lagu burburiyo hawlgal milateri, marka laga reebo inay ka dhalatay baahi milateri. Qabsashada ama burburinta noocaasi ah waa inuu ansixiyaa taliska ugu sarreeya, marka laga reebo in falalkaasi loo sameeyay is difaacid ama weerar uga yimid cadowga;
6. Ula dhaqan dadka kuu xiran si bani'aadannimo leh. Waxaa mamnuuc ah in lagu xadgudubo maxaabiista;
7. Ha isticmaalin hub ama rasaas aan la fasixin;
8. Ha ogolaan ama ha dalban in mudnaan gaar ah lagugu siiyo gudashada waajibaadkaaga, kana fogow wax kasta oo ka horimanaya hawshaada.

BOGGA LABAAD (DHANKA HORE):

NIDAAMKA KU AADDAN DIFAACIDDA ISKUULKA IYO JAAMACADDA

1 Waqti kasta xaqiiji ammaanka dadka rayidka ah, gaar ahaan carruurta, haweenka iyo hawlwadeennada waxbarashada.

2 Ixtiraam baahida asaasiga ah ee carruurta (tusaale; biyo nadiif ah, cunno, hooy, caafimaad iyo waxbarasho).

3 Markasta oo ay suuragal tahay ka fogow in iskuullada shaqeynaya ama kuwa xiran aad u adeegsato dano milateri. Si toos ah askarta loogama shaqaaleysiin karo iskuullada ama jaamacadaha, marka laga reebo inaan looga fursan karin sugidda ammaanka.

4 Qaab keliya ee dano milateri looga isticmaali karo iskuullada laga guuray ayaa ah in xaalad aan laga fursan karin ay qasbeyso adeegsiga xarumahaasi waxbarashada, ka dib marka fasax laga helo taliska ugu sarreeya,

5 Waa in u adeegsiga ujeedo milateri ee xarumaha waxbarashada lagu soo afjaraa mudada ugu kooban, si degdeg ahna looga dayactiraa burburka kasoo gaaray adeegsigaas, si xarunta ay dib ugu bilowdo hawlaheeda waxbarashada ayna u xaqiijiso ammaanka shacabka.

6 Iskuulladu waa hanti shacab oo la ilaaliyay, mana aha in la weerarro. Haddii loo bedelo goob milateri, waa in weerar kasta oo dhan ah uu koobnaadaa, loona adeegsadaa awoodda ugu macquulsan ee lagu gaari karo ujeedada milateri, ayadoo digniin hore lasii bixinayo, haddii ay xaaladdu saamaxayso.

7 Waa in si gaar ah looga taxadaro burburka ku iman kara hantida waxbarashada gaar ahaan iskuullada. Lama weerarri karo ilaa iyo inta ay ka noqonayaan goob ciidan. Waa in si weyn looga fogaadaa in xarumaha ciidanka laga sameeyaa meel u dhaw goobaha waxbarashada. Sidoo kale, waa in goobaha waxbarashada laga raraa agagaarka xarumaha milateri ama laga difaaco burburinta.

8 Waa in taxadar gaar ah ay sameeyaan taliyayaasha mas'uulka ah deegaannada ay ku yaallaan xarumaha waxbarashada si ay goobahaasi uga difaacaan boobka ay geysan karaan askartooda iyo weliba dhinacyada kale.

9 U gudbi taliyayaasha kaa sarreya xadgudub kasta oo ka dhan ah nidaamka.

BOGGA SADDEXAAD (DHANKA HORE):

NASHQADEE WARGELINTA SHACABKA – UGA DIG AGAGAARKA ISKUULLADA

1 Maadaama (CADDEE HAWLGALKA), (CADDEE CIIDANKA) ay ku jiraan diyaargarow ballaaran, ayna sameynayaan feejignaan dheeraad ah oo dhanka difaaca ah si loo xaqiijo u hogaansamidda (CADDEE SHARCIGA LA RAACAYO) iyo badqabka iskuullada, jaamacadaha iyo waxbarashada deegaanka.

2 (CADDEE CIIDANKA) waxa ay qaadi doonaan tallaabooyinka ku haboon ee ay isaga difaacayaan falalka cadowga, haddii ay xaaladdu saamaxdo. Waa dhammaan gaadiidka iyo shakhsiyaadka soo aadda dhanka (CADDEE CIIDANKA) ay tartiib iyo taxadar u socdaan, ayna caddeeyaan waxa ay rabaan.

3 Waa in gaadiidka iyo shakhsiyaadka ay ka dhawrsadaan ku dhawaanshaha iskuulka, marka laga reebo ardada, shaqaalaha waxbarashada iyo kuwa meheradaha sharciyeysan ku haysta gudaha xarunta waxbarashada.

4 Haddii la su'aallo, waa in gaadiidka iyo shakhsiyaadka ay si wanaagsan isu sheegaan, ayna caddeeyaan waxa ay doonayaan, haddii ay amar siiyaan (CADDEE CIIDANKA), waana inay si degdeg ah amarka u qaataan si loo fahmo waxa ay doonayaan. Fadlan xasuusnow in (CADDEE CIIDANKA) ay u diyaarsan yihiin inay is difaacaan, haddii loo baahdana ay awood wax disha u adeegsan karaan qof kasta oo aan heybtiisa ama ujeedkiisa la aqoon iyo kuwa khatarta ku ah ciidankaas.

5 Digniintan loogama gol laha in lagu xannibo ama lagu farageliyo dhaqdhaqaaqa shacabka aan dembiga lahayn, lagu yareeyo ama lagu kordhiyo xaqa ay ciidanka u leeyihiin inay iska difaacaan falalka cadowga ku ah (CADDEE CIIDANKA). Waxaa digniintan loo daabacay oo keliya in dadka lagu wargeliyo diyaargarowga ballaaran ee uu ku jiro (CADDEE CIIDANKA) iyo in laga codsado gaadiidka iyo shakhsiyaadka inay raacaan tilmaamaha kor ku xusan si qofkasta uu u badbaado.

BOGGA SADDEXAAD (DHANKA HORE):

NAQSHADEE SHURUUCDA ISKA HORIMAADKA

IS DIFAACID: Ma jiro qodob ka tirsan shuruucda iska horimaadka oo xadiddi kara xaqa aad u leedahay in awood, oo ay ka mid tahay tan wax disha, aad u adeegsato si aad naftaada ama tan askarta kale ee ciidankaaga uga difaacdo khatar markaa ku soo wajahan oo dili karta ama u geysan karta dhaawac halis ah.

AWOODDA UGU YAR: Waxaa markasta qasab ah in awoodda la ogol yahay aan lagu takri falin, oo loo adeegsado si macquul ah oo isu dheeli tiran, kuna salaysan xaaladda markaa taagan. Waana muhiim in arimahaasi la tixgeliyaa marka la adeegsanayo awoodda. Xaaladaha qaar, AWOODDA WAX DISHA ayaa noqon karta tan ku haboon marxaladdaasi, ahna heerka ugu yar.

AWOODDA AAN WAX DILIN: Waxaa la ogol yahay in loo adeegsiga awoodda aan wax dilin:

HANTIDA: Marka hantida laga difaacayo dhaca ama burburka;

XARIGA: Si loo xiro qof kasta oo gala goob aanu ogolaansho u haysan;

BAARITAAN: Si loo baaro qof kasta oo gala goob aanu ogolaansho u haysan ama loo xiray haysashada hub ama waxyaabo kale oo khatar ah;

XAALADAHA KALE:

Si dadka looga celiyo inay galaan goob aanay ogolaansho u haysan;

In qof laga saaro goob aanu ogolaansho u haysan oo uu galay;

In qof la xiray laga horjoogsado inuu baxsado;*

In qof hubka laga dhigo; iyo

Qabsashada gawaaridda qeybta ka ah hawlgalka.

*AWOODDA AAN WAX DILIN oo keliya ayaa loo adeegsan karaa in lagu joojiyo carruurta ka baxsata xariga. Waa in hay'adda ammaan ee ku haboon ay dadka la xiray u sheegtaa sababta loo qabtay iyo xuquuqda sharci ee ay leeyihiin. Waa in dadka xiran sida ugu dhaqsaha badan loogu wareejiyaa hay'adda ku haboon.

AWOODDA WAX DISHA: Adeegsiga awoodda, oo gaarsiisan ilaa heerka tan wax disha ayaa la ogolyahay in:

La isku difaaco;

Lagu difaaco dadka hoos ku xusan khatar markaa ku soo wajahan oo dili karta ama u geysan karta dhaawac halis ah.

Qof kasta, oo ay ka mid yihiin shaqaalaha aan milateriga ahayn ee saaran markab ama diyaarad ama dhismo;

Askarta xulafada la aqoonsan yahay ee ka qeyb qaadanaya hawlgalka; iyo

Qof kasta oo u xiran ciidanka.

BOGGA SADDEXAAD (DHANKA DAMBE):

NAQSHADEE SHURUUCDA ISKA HORIMAADKA (Sii socda)

TALAABOOYINKA LA QAADO MARKA LA ADEEGSANAYO AWOODDA:

Haddii uusan weerarka u dhicin si kadis ah oo dib u dhac yar uu keeni karo dhimasho iyo dhaawac ba'an, awood kasta oo la adeegsanaya – haddii waqtiga iyo xaaladuba saamaxaan – waa in sidan loo kala hormariyaa:

AWOODDA AAN WAX DILIN:

Joogitaan: Waa in goobta ay ku sugnaadaan ciidan tababaran oo asluub leh;

Digniin: Ku celceli digniinta afka iyo muujinta ah ilaa iyo inta ay ka caddaaneyso in la arkay ama la maqlay;

Ku Xakameyn Gacmo Maran: Adeegsiga qaab aan hubeysneyn, sida riixidda, si jilicsan u xakameynta gacanta, jugta fudud ama xariga, iwm.;

Adeegsiga Hub Dhexdhexaad ah: Sida in dad u tababaran ay adeegsadaan usha ama basbaas xakameysan (marka la ansixiyay oo keliya); iyo

Adeegsiga Qalabka Xakameynta: Sida jeebooyinka, oo ay ka mid yihiin kuwa caagga ah, waxaana la ogol yahay oo keliya xilliyada ay socdaan hawlgallada sugidda ammaanka.

HADDII AAN LAGUU OGOLEYN ADEEGSIGA AWOODDA WAX DISHA, GOOBTAN HA DHAAFIN.

AWOODDA WAX DISHA:

Muujinta Awood Ciidan: Cabbeynta hubka, diyaarinta, shiiska saaridda, muujinta inay ka go'an tahay adeegsiga awoodda wax disha;

Warning Shots: Fire at a safe point of aim; and

Rasaas Digniin ah: Meel cidla ah ku rid rasaas dignaan ah

Awoodda Wax Disha: Haddii aad fasax u haysato inaan rasaas riddo, waa inaad riddaa;

Rid oo keliya rasaasta shiishka kuu saaran yahay, ha riddan xabbado badan oo aan loo baahneyn;

Sida ugu macquulsan ku dadaal yareynta khasaaraha aan loo baahneyn; iyo

Jooji rasaasta marka ugu horreysa ee ay xaaladdu saamaxdo.

XAALADAHA DIYAARINTA HUBKA: Waxaa xaaladaha diyaarinta hubka amri kara taliyaha ciidanka ama haddii aanu joogin taliyaha goobta ku sugan.

KU XADGUDUBKA NIDAAMKA/ADEEGSIGA AWOOD: Ku wargeli taliyahaada dhammaan adeegsiga hubka ee la ogyahay ama laga shakisan yahay iyo ku xadgudubka nidaamka.

BOGGA AFARAAD (DHANKA HORE)

BARTILMAAMEEDSIGA IYO SHURUUCDA ISKA HORIMAADKA

Bartilmaameedsigu waa hannaanka lagu dooranayo, mudnaanta lagu siinayo bartilmaameedka isla markaana lagu aaddinayo jawaabta ku haboon, ayadoo maanka lagu hayo shuruudaha iyo awoodda hawlgalka, xaaladda jirta, shuruucda iska horimaadka ee la adeegsan karo iyo shuruucda colaadaha hubaysan.

Ciidanku waxa uu bartilmaameedsan karaa goobaha milateri, asagoo raacaya shuruucda colaadda hubaysan iyo kuwa iska horimaadka. Waxaa suuragal ah in shuruucda iska horimaadka ay xakameeyaan siyaasadda bartilmaameedsiga ee ka baxsan shuruudaha ku xusan shuruucda colaadaha hubaysan. Beegsiga iskuullada iyo jaamacadaha ayaa lagu daray liiska goobaha la xakameeyay bartilmaameedsigooda (marka laga reebo xaaladaha u baahan adeegsiga awood si ciidanka uu isaga difaaco cadowgiisa, ama marka ay iskuullada noqdaan goob ciidanku adeegsanayo ama deegaanka ay ku yaallaan awgeed, iyo marka qabsashadooda iyo burburintooda guud ama qeyb ahaan ay keenayso guulo milateri xaaladda markaa taagan awgeed, balse waa in amarka uu bixiyaa taliyaha ciidanka isku dhafka ah) iyo liiska goobaha aan la duqeyn karin (dhammaan xaaladaha kale)

MA JIRTO SABAB WEERAR LAGULA BEEGSAN KARO ISKUUL AMA JAAMACAD AAN AHAYN GOOB MILATERI

Ma jirto sabab lagu ogolaan karo weerar ka dhan ah iskuulka haddii khasaaraha dhimasho iyo dhaawac ee soo gaari kara dadka rayidka ah, gaar ahaan macallimiinta iyo shaqaalaha waxbarashada, iyo burburka iskuulka ay ka badan yihiin guusha milateri ee laga gaari karo weerarkaasi.

Maamulka sare ayaa faraya in la adeegsado xakameyn heer sare ah marka la filayo in khasaaraha dhimasho ama dhaawac ee soo gaari kara qeyb ka mid bulshada (carruurta, ardada rayidka ah iyo shaqaalaha waxbarashada) uu sarreeyo.

Haddii ay suuragal tahay, waa in la curyaamiyaa iskuullada laga dhigay goobaha milateri, halkii laga burburin lahaa.

BOGGA AFARAAD (DHANKA DAMBE):

NAQSHADEE LIISKA BARTILMAAMEEDKA

Qeexidda Bartilmaameedka: Tixraaca goobta:

1	Sida ku cad shuruucda iska horimaadka/awaamirta kale, fasax ma u haysataa weerarridda Iskuul ama Jaamacad? Haddii jawaabtu haa tahay, ku dhaqaaq 2. Haddii kale ***HA WEERARRIN*** .
2	Ma ku jiraan Iskuulka ama Jaamacadda liiska goobaha aan La Duqeyn karin/kuwa la xadiday bartilmaameedsigooda? Haddii jawaabtu maya tahay, ku dhaqaaq 3, Haddii kale ***HA WEERARRIN.***
3	Bartilmaameedsiga iskuulka ama jaamacadda ma waxa uu xoojinayaa tallaabada milateri ee ciidanka cadowga? Haddii jawaabtu haa tahay ku dhaqaaq 4. Haddii kale ***HA WEERARRIN***.
4	Ma guul milateri oo muuqata ayaa ka dhalanaysa in iskuulka lagu burburiyo xaaladdaasi? Haddii jawaabtu haa tahay ku dhaqaaq 5. Haddii kale ***HA WEERARRIN***.
5	Ma waxaa la filayaa in weerarka uu dhaliyo khasaaro dhimasho ama dhaawac oo ku timaada dadka rayidka ah, gaar ahaan ardada iyo shaqaalaha waxbarashada ma burbur ku yimaada hantida shacabka, gaar ahaan Iskuullada ama Jaamacadaha ama Arimahaasi oo dhan. Haddii jawaabtu haa tahay, ku dhaqaaq *6*. Haddii jawaabtu maya tahay, ku dhaqaaq 11.
6	Khasaarahaasi ma ogol yihiin amarka lagu siiyay iyo Shuruucda Iska Horimaadka? Haddii jawaabtu haa tahay, ku dhaqaaq *7*. Haddii kale ***HA WEERARRIN***
7	Ma jirtaa xarun milater oo bedel u noqon karta beegsiga iskuulka, lagana gaari karo guul la mid ah, balse ka khasaaro yar?Haddii jawaabtu maya tahay, ku dhaqaaq 8.Haddii jawaabtu haa tahay, ku laabo 1 ee bartilmaameedka cusub
8	Ma laga taxadaray nooca iyo qaabka uu weerarka noqonayo si looga baaqsado ama loo yareeyo khasaaraha aan ku talagalka ahayn ee soo gaari kara shacabka iyo hantidooda, gaar ahaan ardada, shaqaalaha waxbarashada iyo iskuullada? Haddii jawaabtu haa tahay ku dhaqaaq 9. Hadii jawaabtu maya tahay, sidaa samee, ka dibna dib u qiimee 8.
9	Ma la bixiyay digniin hormarsan oo wax ku ool ah, taasoo ah in weerarka uu saameyn karo bulshada rayidka ah, gaar ahaan weerarrada saameynta ku yeelan kara hannaanka waxbarashada? Haddii jawaabtu haa tahay ku dhaqaaq 10. Haddii jawaabtu maya tahay, balse xaaladdu saamaxayso, digniin bixi ka hor inta aadan ku dhaqaaqin 10.
10	Ma waxaa la filayaa in weerarka uu dhaliyo khasaaro dhimasho ama dhaawac oo ku timaada dadka rayidka ah, gaar ahaan ardada iyo shaqaalaha waxbarashada ma burbur ku yimaada hantida shacabka, gaar ahaan Iskuullada ama Jaamacadaha ama Arimahaasi oo dhan, isla markaana ka sareeya guusha milateri ee laga filayo weerarka? Hadii jawaabtu maya tahay, ku dhaqaaq *11*. Haddii kale ***HA WEERARRIN.***
11	***WEERARKA WAA LA OGGALAADAY – SII WAD INAAD DUSHA KALA SOCOTO XAALADDA.*** ***HADDII AY WAX ISBEDELAAN – WAA WAAJIB SHARCI AH OO KU SAARAN INAAD DIB U QIIMEYN KU SAMAYSO WEERARKA.***

BOGGA SHANAAD (DHANKA HORE):

NAQSHADEE WARBIXINTA – WEERARRID AMA MILATERI ADEEGSADAY ISKUUL AMA JAAMACAD

Goobta Iskuulka (Tilmaanta Grid, GPS, Caalamado dhuleed muhiim ah)		Magaca Iskuulka – nooca – faahfaahinta				
Maamulka Iskuulka		Nooca xarunta iskuulka			Jinsiga ardada	
Dowlad ☐	Hay'ad aan dowli ahayn ☐	Hoose/dhexe ☐	Tababar ☐	Garoon ☐	Lab ☐	Dhedig ☐
Bulsho ☐	Nooc kale ☐	Sare ☐	Nooc kale ☐	Jaamacad ☐	Isku jir ☐	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad :						
Nooca weerarka:		Weerar lagu qaaday ardada/ macallimiinta ☐		Ciidamo degan/adeegsanaya ☐ Tiradooda:_____		
Duqeyn/hoobiye ☐		Duqeyn cirka ah ☐		Hubka fudud ☐	Xatooyo/dhac☐	Gubid☐
Qorasho ☐		Afduub ☐	Walxaha qarxa ☐	Weerar is qarxin ah ☐	Tacaddiyo galmo ☐	Hubka wax gumaada ☐
Waqtiga maalinta		Subax ☐	Duhur ☐	Galab ☐	Habeen ☐	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:						
Tilmaanta falka cidda geysatay – dowlad ama urur aan dowli ahayn (Mid goobo geli)				Tirada dembiilayaasha (haddii la ogyahay):		
Khasaaraha muuqda ee ka dhashay weerarka:						
Gebi ahaanba burburay ☐		Qeyb ahaan burburay ☐		Burbur yar ☐		Midna ☐
Macluumaad:						
Xarunta ma u xirantay weerarka awgii?			Maya ☐	Haa ☐	_____Maalmood	
Macluumaad :						

BOGGA SHANAAD (DHANKA DAMBE):

NAQSHADEEE WARBIXINTA – DHAAWACA TOOSKA AH IYO KAN AAN ULA KACA AHAYN EE SOO GAARA ARDADA IYO SHAQAALAHA WAXBARASHADA

Waa in si gaar ah loo diiwaangeliyo faahfaahinta ardada iyo shaqaalaha waxbarashada ee la dilay, dhaawacmay ama la qortay.

Khasaaraha bani'aadannimo ee ka dhasha weerarka waxbarashada				Jinsiga ardada	
Arday miyaa la dilay?	MAYA ☐	HAA ☐	Wadar _____	Lab _____ Dhedig _____	Isku jir ☐ _____
Arday miyaa la dhaawacay?	MAYA ☐	HAA ☐	Wadar _____	Lab _____ Dhedig _____	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:					
Macallimiin miyaa la dilay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	Isku jir ☐ _____
Macallimiin miyaa la dhaawacay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	Aan la ogeyn ☐
Macluumaad:					
Arday miyaa la qortay?	MAYA ☐	HAA ☐	Tirada. _____	Lab _____ Dhedig _____	
Macluumaad:					

BOGGA LIXAAD (DHANKA HORE):

WAXYAABAHA LA SAMAYN KARO IYO KUWA AAN LA SAMAYN KARIN EE HAWLGALKA MILATERI

LA SAMAYN KARO	AAN LA SAMAYN KARIN
In lagu dhiirageliya milateriga iyo booliska xulafada ah, iyo dhinacyada hubaysan ee kasoo horjeeda in sinaba aanay u adeegsan karin iskuullada ama jaamacadaha.	In iskuullada loo adeegsado hawlo milateri.
Aqoonso waajibaadka hawlgalkaaga iyo dawrka uu ku leeyahay difaacidda carruurta iyo waxbarashada. Waxaa jira hay'ado kaa gacan siin kara, kuna haboon hawlahaasi (waxbarashada, caafimaadka, cunnada, iwm) halka adigana aad xoogga saari kartid sugidda ammaanka.	Inaad ka niyad jabto haddii aadan degdeg u dayactiri karin ama u caawin karin iskuullada iyo jaamacadaha burburay. Ka warbixi waxyaabaha kuu muuqda iyo walaaca aad qabto; tani waxay u ogolaanaysaa hay'adaha ay khuseyso inay xaqiijiyaan dib usoo celinta waxbarashada.
Ka feker mashaariicda kale ee aad bulshada u fidin karto ee ka baxsan dhisidda iskuullada iyo la ciyaaridda ardada.	Inaad hawlgalo milateri ka ka samayso ama aad qalab ciidan iyo askar dhigto masaafada uu hubka ka gaari karo iskuullada, jaamacadaha, iyo wadooyinka loo maro.
Kala shaqee hay'adaha rayidka ah, kuwa aan dowliga ahayn, iyo bulshada deegaanka sidii go'aan looga gaari lahaa barnaamijyada shacabka lagu caawinayo ee waxtarka u leh iskuullada, carruurta iyo ardada.	Inaad waqtigaaga firaaqada la qaadato carruurta ama shaqaalaha waxbarashada.
In aad ku wargeliso taliskaaga haddii aad aragto arimo khatar ku ah carruurta ama waxbarashada.	Inaad xiriir galmo la yeelato carruurta.

BOGGA LIXAAD (DHANKA DAMBE):

LA SHAQEYNTA DADKA KALE



www.childsoldiers.org

THE ROMÉO DALLAIRE CHILD SOLDIERS INITIATIVE

LIFAAQA I
TILMAAHAMA KA HORTAGGA IN CIIDAMADA AY ISKUULLADA IYO JAAMACADAHA ADEEGSADAAN XILLIYADA AY DAGAALLADU SOCDAAN

Waxaa loogu baaqayaa dhinacyada ku lugta leh colaadda in aanay ujeedooyin milateri u adeegsan iskuullada iyo jaamacadaha. Inkastoo la garawsan yahay in isticmaalka qaarkii aanu khilaafsaneyn sharciga colaadaha hubaysa, ayaa haddana dhammaan dhinacyada waxaa laga doonayaa inay ku dadaalaan sidii ay u xaqiijin lahaayeen ammaanka ardada iyo waxbarashada, ayaga oo raacaya tilmaamaha soo socda:

Tilmaan 1: Looma oggola ciidamada dhinacyada dagaallamaya inay adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha shaqeynaya ama ay ku taageeraan hawlgalkooda milateri.

a Qodobkan waxaa hoos imanaya iskuullada iyo jaamacadaha sida kumeelgaarka ah u xiran, kuwa saacadaha iyo maalmaha fasaxa ah ku jira, iyo kuwa galay fasaxa sanad dugsiyeedka,

b Dhinacyada isku haya colaadda ma adeegsan karaan awood ama sasabasho kale si ay maamulka waxbarashada ugu qanciyaan in xarumaha la xiro si loogu adeegsado dano milateri.

Tilmaan 2: Looma oggola in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay ujeedooyin milateri u adeegsadaan iskuullada iyo jaamacadaha u xirmay khatar uga timid dagaalka awgeed, marka laga reebo in xaaladda jirta ay sidaa ku kalifto, isla markaana aanay jirin wax bedel u noqon kara oo ay adeegsan karaan ciidankaasi. Waxaa xarumahaasi waxbarashada ee laga guuray la adeegsan karaa ilaa iyo inta laga helayo meel kale oo uga haboon adeegsiga milateri. Waa in mudnaanta la siiyaa dhismayaasha kale oo la adeegsadaa bedelkii ay ciidanka degi lahaayeen iskuullada iyo jaamacadaha, xataa haddii aanu qaabkooda wanaagsaneyn, waxaase reeban in la adeegsado dhismayaasha uu ilaaliyay Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada (sida cisbitaallada), waana in maanka lagu hayo in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay weerarrada ka ilaaliyaan hantida shacabka.

a Waa in waqtiga ugu kooban uu qaataa u adeegsiga ujeedooyinka milateri ee iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray.

b Waa in xooggaga hubaysan ee qeybta ka ah colaadda, isla markaana adeegsanaya iskuullada iyo jaamacadaha laga guuray ay u oggalaadaan mas'uuliyiinta waxbarashada inay dib u furan xarumahaasi ka dib marka ay ka baxaan ciidanka, waa haddii aanay arintaasi khatar galineyn ammaanka ardada iyo shaqaalaha.

c Marka ay ciidanka ka guurayaan xarunta waxbarasho, waxaa looga baahan yahay inay dayactir buuxa ku sameeyaan burburka soo gaaray dhismayaasha, ayna xaqiijiyaan inay meesha ka saaraan dhammaan waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay. Gaar ahaan waa in goobta laga nadiifiyaa dhammaan hubka, rasaasta iyo walxaha aan weli qarxin.

Tilmaan 3: Lama oggola in iskuullada iyo jaamacadaha loo burburiyo si aanay mustaqbalka u isticmaalin xooggaga dhinaca kale ee qeybta ka ah colaadda hubaysan. Xilli kasta, iskuullada iyo jaamacadaha waa hanti shacab, haddii ay ahaan lahaayeen kuwa ay waxbarashada ka socoto ama ku jira fasax gaaban ama mid dheer, ama laga guuray.

Tilmaan 4: Inkastoo haddii dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu iskuullada ama jaamacadaha u adeegsado ujeedooyin milateri ay ka dhigi karto, ayadoo la eegayo xaaladda, xarumo ciidan oo weerar lala beegsan karo, ayaa haddana dhinaca kale ee hubaysan waxaa looga baahan yahay inuu ka baaraandego qaabab kale ka hor inta aanu weerarrin xarumahaasi, sida in haddii xaaladu saamaxayso uu waqti hore usii digaa cadowgiisa inuu weerar kusoo wajahan yahay haddii aanu ka guurin xaruntaasi.

a Ka hor inta aanu dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya weerarrin iskuulka, waxaa looga baahan yahay inuu tixgeliyo xaqiiqda ah in carruurta ay leeyihiin ixtiraam iyo ilaalin. Sidoo kale waa inuu tixgeliyaa saameynta xun ee mudada dheer ay bulshada ku yeelan karto helitaan la'aanta waxbarasho ee ka dhalata burburinta iskuullada.

b Ma aha in dhinac ka mid ah xooggaga dagaallamaya uu kusoo duulo iskuulka uuna ka qabsado dhinaca kale si uu danihiisa milateri ugu soo wato. Waa in sida ugu dhaqsaha badan meesha looga saaraa waxyaabaha muujinaya in goobta uu ciidan adeegsanayay, isla markaana lagu wareejiyaa mas'uuliyiinta rayidka ah si xarunta loogu adeegsado hawlaha waxbarashada.

Tilmaan 5: Ma aha in askar ka tirsan dhinacyada ku lugta leh colaadda loo qorto inay sugaan ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa haddii ay jiraan dad kale oo hawshaas qaban kara. Haddii ay suuragal tahay, shacab si wanaagsan loo tababaray ayaa loo shaqaaleyn karaa sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha. Haddii lagama maarmaan ay tahay, waxaa la tixgelin karaa in carruurta, ardada iyo shaqaalaha loo daadgureeyo meel ammaan ah.

a Haddii askar ka tirsan dhinacyada dagaallamaya ay ku hawlan yihiin sugidda ammaanka iskuullada iyo jaamacadaha, waa in sida ugu macquulsan looga fogaadaa in ay ku sugnaadaan gudaha xarumahaasi, si aan loo soo weerarrin isla markaana aan loo carqaladeyn jawiga waxbarashada.

Tilmaan 6: Waa in dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadaha hubaysan ay sida ugu macquulsan oo ugu haboon tilmaamahan ugu daraan dhaqanka ciidankooda, buugaagta milateri, shuruucda iska horimaadka, awaamirta hawlgalka, iyo qaababka kale ee lagu gudbin karo, si taliyayaasha ay ugu faafiyaan qaabka ugu wanaagsan. Waa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay go'aansadaan habka ugu wanaagsan ee ay sidaa ku samayn karaan.

LIFAAQ II
FALANQEYNTA NIDAAMKA SHURUUCDA CAALAMIGA AH EE KHUSEEYA IN MILATERIGA UU ADEEGSADO ISKUULLADA XILLIYADA AY SOCDAAN COLAADAHA HUBAYSAN[9]

Nidaamka sharci ee khuseeya bartilmaameedsiga iskuullada iyo jaamacadaha, iyo in xarumahaasi loo adeegsado ujeedooyin milateri inta ay socdaan colaadaha hubaysan, ayaa waxaa uu ku jiraa sharciga colaadda hubaysan (sidoo kalena loo yaqaan sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada), kaasoo ah mid nidaamiya hab dhaqanka inta ay socdaan colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn. Inkastoo sharciga colaadda hubaysan ay ku jiraan dhammaan xeerarka maamulaya bartilmaameedka, ayaa haddana aanu xoogga saarin iskuullada loo adeegsado ujeedooyinka milateri, kuwaasoo uu sidoo kale saameynayo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Sidaa awgeed, waxaa muhiim ah in la garawsado in sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha uu kabayo kan colaadda hubaysan, labaduba hoos ayaa lagu falanqeeyay.

Sharciga Colaadda Hubaysan (Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada)

Sharciga colaadda hubaysan ayaa xakameeya bartilmaameedsiga xarumaha waxbarashada iyo in loo adeegsado ujeedooyin milateri, balse ma uu mamnuucayo in gebi ahaanba ay ciidamada adeegsadaan iskuullada xaalad kasta oo jirtaba, waxaana uu oggolaanayaa in iskuullada iyo jaamacadaha la bartilmaameedsan karo marka ay noqdaan goobo milateri.

Sida caadiga ah, iskuullada iyo jaamacadaha waa hanti shacab, mana aha in la weerarro ilaa iyo inta ay ka noqonayaan goobo ciidan.[10] Dhab ahaantii, in weerar ula kac lagu qaado xarumahaasi ayagoo aanay ciidan adeegsaneyn ayaa ka dhigan dembi dagaal. Goob milateri waxaa loola jeedaa kuwa qaabkooda, goobtooda, ujeedadooda ama adeegsigooda uu gacan ka geysan karo hawlgalka ciidan, halka burburintooda guud ama qeyb ahaan, qabsashadooda ama ka taqalusidooda, ayadoo la eegayo xaaladda markaa jirta, ay keeni karto guul milateri.[11] Haddii laga shakiyo in iskuul ama jaamacad loo adeegsado ujeedooyin milateri, waa in loo tixgeliyaa in aan qaabkaas loo adeegsan ee uu yahay hanti shacab.[12]

Sharciga colaadda hubaysan waxa uu ka doonayaa dhinacyada dagaallamaya inay ka taxadaraan saameynta uu yeelan karo weerarka. Ilaa iyo inta ay iskuullada iyo jaamacadaha yihiin hanti shacab, waa in dhinacyada ku lugta leh colaadda ay sida ugu haboon; a) uga baaqsadaan in xarumaha milateri ay ka sameeyaan goobaha ay dadka ku badan yihiin ama deegaannada u dhaw iskuullada iyo jaamacadaha; b) dadka shacabka ah iyo hantidooda uga saaraan deegaannada u dhaw goobaha ciidanka; iyo c) u qaadaan tallaaba kasta oo ay uga hortagayaan in khatarta ka dhalata hawlgallada milateri ay soo gaarto iskuullada iyo jaamacadaha hoos yimaada.[13] Xeerarkan ayaa saameyn weyn ku leh iskuullada iyo jaamacadaha.

In iskuulka ama jaamacadda loo adeegsado ujeedo milateri (tusaale ahaan in laga dhigo saldhig ciidan) ayaa waxa ay usoo jiidaysaa weerar uga iman kara dhinaca kale ee kasoo horjeeda ciidanka meesha fadhiya, oo si ahaan gar noqon kara marka la eego sharci colaadda hubaysan. In meel u dhaw iskuulka ama jaamacadda la dhigo qalab milateri (tusaale ahaan, keydka hubka) ayaa sidoo kale kordhinaysa khatarta ku iman karta xarumahaasi waxbarasho marka la bartilmaameedsanayo goobahaasi, taasoo loo qaateen noqon karta marka la eego sharci colaadda hubaysan.

Iskuullada iyo jaamacadaha loo arko inay muhiim u yihiin dhaqanka dadka halkaa ku nool ayaa waxaa difaac gaar ah siinaya Xeerka 1954 la ansixiyay ee Ilaalinta Hantida Dhaqan Xilliyada ay Colaadda jirto (Hague Convention for the Protection of Cultural Property in the Event of Armed Conflict) iyo Borotokoolkiisa Labaad ee 1999, iyo sidoo kale xeer-dhaqameedka la xiriira. Si gaar ah waxaa loo mamnuucay adeegsiga

xarumahaasi u keeni kara burbur, haddii aanay jirin sabab aan laga baaqsan karin oo ku qasbeysa ciidanka hubaysan.[14]

Waxaa jira marxalado dhif ah oo xarumaha waxbarashada ee muhiimadda gaarka ah u leh dhaqanka dadka ay difaaca khaas ah uga helayaan Borotokoolka Dheeriga ah ee Xeerka Geneva.[15] Waxaa marxaladahaasi ka mid ah marka iskuulka iyo jaamacadda ay ku dhex yaallaan dhismo leh muhiimad dhaqan, markaasi waxaa mamnuuc ah in xaruntaasi loo adeegsado ujeedooyin milateri. Waxaa sidoo kale mamnuuc ah in la weerarro, gaar ahaan in lagu bartilmaameedsado weerarrada aargoosiga ah.

Sida uu dhigayo sharciga Hay'adda Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas, iskuullada iyo jaamacadaha waxa ay leeyihiin difaac gaar ah maadaama sida uu dhigayo xeer-dhaqameedka ay yihiin hanti dhaqan. Xeerka 38 ee hay'addaasi ayaa dhigaya in dhammaan dhinacyada qeybta ka ah colaadda ay ixtiraamaan oo ay difaacaan dhismayaasha gaarka u ah waxbarashada kuwaasoo qeyb ka ah hantida dhaqanka.[16] Tani waxay ka dhigan tahay inay waajib tahay in laga baaqsado waxyeelleynta dhismayaasha u gaarka ah waxbarashada (haddii aanay ahayn goobo milateri) iyo inay mamnuuc tahay in la qabsado, la burburiyo ama la waxyeelleeyo xarumahaasi.[17]

Ma aha in xeerarka kor ku xusan si gaar ah loo fasiraa. Waa in xisaabta lagu darsadaa xeerarka iyo mabaadii'da kale ee sharciga colaadda hubaysan.[18] Waxaa xeerarkaasi ka mid ah kuwa sida gaarka ah u difaacaya carruurta ku sugan goobaha ay colaadda ka jirto.[19] Haddii xarumaha waxbarashada si buuxda ama qeyb ahaan loogu adeegsanayo ujeedooyin miateri, ayaa taasi waxa ay khatar gelinaysaa noolasha carruurta[20] waxaana sidaa ku xadidmaya helitaanka waxbarashada maadaama carruurta aanay aadi karin iskuulka cabsi ay ka qabaan inay waxyeello kasoo gaarto weerarrada awgeed ama maadaama laga horjoogsaday inay wax ku bartaan dhismaha ay yaqaanaan.

Sida uu dhigayo Xeerka Afaraad ee Geneva, oo dhaqangal noqon kara xilliyada colaadaha hubaysan ee caalamiga ah, ciidanka deegaanka qabsaday —oo ah kan xukuma deegaan cadow ku ah — ayaa looga baahan yahay inuu kala shaqeeyo mas'uuliyiinta qaran iyo kuwa maxalliga ah, "si loo fududeeyo inay hawlgalaan dhammaan xarumaha loogu talagalay waxbarashada carruurta."[21]

Sida uu dhigayo Borotokoolka Dheeriga ah ee II, kaasoo dhaqangal noqon kara xilliyada colaadaha hubaysan ee aan caalamiga ahayn, waa "damaanadqaad asaasi ah" in carruurta ay waxbarasho helaan, ayadoo la raacayo rabitaanka waalidkood.[22]

Ma aha in dadka rayidka ah —carruurta, ardada, macallimiinta iyo shaqaalaha iskuulka — ee ku sugan xarunta waxbarashada loo adeegsado gabbaad ciidan ama mid hawlgal milateri.[23]

Ka hor inta aan iskuulka ama jaamacadda loo adeegsan ujeedo milateri, waa in tixgelin la siiyaa dhammaan xeerarka iyo mabaadii'da sharciga colaadda hubaysan, gaar ahaan in laga taxadaro saamaynta ay weerarrada ku yeelan karaan waxbarashada oo xarumaheeda loo arko hanti dhaqan, iyo helitaanka waxbarashada ee deegaannada ay colaaddu ka jirto, mamnuucidda gabbaad ka dhigashada dadka, iyo difaaca gaarka ah ee ay leeyihiin carruurta ku sugan goobaha colaaddu ka jirto.

[9] Isla masdarkii.

[10] Eeg borotokoolka dheeriga ah ee Xeerka Geneva ee 12-kii Agoosto, 1949, isla markaana la xiriira Difaacidda Dhibbanayaasha Colaadaha Hubaysan ee Caalamiga ah ("Borotokoolka Dheeriga ah I"), qodobka. 52(1). Xeerkan ayaa sidoo kale qeyb ka ah xeer-dhaqameedka colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn. Eeg buugga ay qoreen Jean-Marie Henckaerts iyo Louise Doswald-Beck ee Xeer-dhaqameedka Sharciga Caalamiga ah ee Bani'aadannimada: Xeerarka, majallada 1, Hay'adda Caalamiga ah ee Laanqeyra Cas ("ICRC Customary IHL Study"), xeerarka 9 iyo 10.

[11] Eeg Borotokoolka Dheeriga ah 1 qodobka. 52(2). Xeerkan ayaa sidoo kale qeyb ka ah xeer-dhaqameedka colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn. Eeg ICRC Customary IHL Study, xeerka 8. Sidoo kale eeg ICTY, warbixintii ugu dambeysay ee guddiga loo saaray dib-u-eegista duqeymihii ay NATO ka geysatay Jamhuuriyaddii Federaalka ahayd ee Yugoslavia uu u gudbiyay dacwad oogaha Hague, 14-kii Juun 2000, §41.

[12] Sidoo kale eeg Borotokoolka Dheeriga ah I, qodobka. 52(3). Mabda'a tixgelinta in iskuulku yahay hanti shacab, haddii laga shakiyo in loo adeegsanayo ujeedooyin milateri ayaa ku xusan Borotokoolka II ee wax laga bedelay ee Xeerka Adeegsiga Hubka Qaarkii. Xeer-dhaqameedka sharciga weli ma sugna, balse waxaa ku cad in haddii xarun waxbarasho laga shakiyo, ti deggan loo hubiyo. Eeg ICRC Customary IHL Study, faallada xeerka 10.

[13] Eeg Borotokoolka Dheeriga ah I, qodobka. 58(a), (b), iyo (c). Xeerkan ayaa sidoo kale qeyb ka ah xeer-dhaqameedka colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn. Eeg ICRC Customary IHL Study,xeerarka 22-24. Sidoo kale eeg: ICTY, kiiska Kupreskic, Xukunka, Heerka koobaad ee maxkamadeynta, 14-kii Janaayo 2000, §§524-525.

[14] Eeg xeerka Ilaalinta Hantida Dhaqan Xilliyada ay Colaadda jirto (1954 Hague Convention for the Protection of Cultural Property in the Event of Armed Conflict), qodobka. 4(1), iyo ICRC Customary IHL Study, xeerka 39.

[15] Eeg Borotokoolka Dheeriga ah I, qodobka. 53(1), iyo Borotokoolka Dheeriga ah ee Xeerka Geneva ee 12-kii Agoosto 1949, isla markaana la xiriira Difaacidda Dhibbanayaasha Colaadaha Hubaysan ee Caalamiga ah ("Borotokoolka Dheeriga ah II"), qodobka. 16.

[16] ICRC Customary IHL Study, xeerarka 38-40. Waxaa jira tiro shuruuc qaran iyo kuwo milateri ah oo u aqoonsan xarumaha waxbarashada goobo dhaqan. Intuu socday wadatashigii lagu diyaariyay tilmaamaha hadda jira, ayaa waxaa jiray dalal diidday in dhammaan iskuullada iyo jaamacadaha loo aqoonsado hanti dhaqan.

[17] Isla masdarkii. Sidoo kale eeg Nidaamyada Ilaalinta Shuruucda iyo Dhaqannada Dagaalka Dhulka ee lagu lifaaqay Xeerka Afaraad ee Hague ee 18-kii Oktoobar 1907 ("the Hague Regulations of 1907"), qodobka. 56.

[18] Kani waa sharciga qadiimiga ah ee fasiraadda. Eeg Xeerka Vienna ee Sharciga Heshiisyada, art. 31(1): "Waa in heshiiskaa loo fasiro si niyad sami ah oo waafaqsan micnaha caadiga ah ee ku xusan shuruudaha heshiiska iyo si la jaanqaadeysa ujeedooyinka laga leeyahay."

[19] Difaaca gaarka ah ee la siiyay carruurta ku nool goobaha colaadda, eeg Xeerka Geneva ee khuseeya Difaaca Shacabka ee Xilliyada Dagaalka ("Xeerka Afaraad ee Geneva"), qodobada. 14, 17, 23, 24, 38, 50, 82, 89, 94, 132; Borotokoolka Dheeriga ah I, art. 70, 77, 78; Borotokoolka Dheeriga ah II, qodobka. 4 iyo 6.

[20] Waa in la ogaadaa in si gaar ah uu xeerka colaadda hubaysan uga hadlay samaynra deegaanno badqada si carruurta ka yar 15 jirka looga difaaco saamaynta dagaalka (eeg Xeerka Afaraad ee Geneva, qodobka 14) Tani waxay caddeyneysaa in sharciga colaadda hubaysan uu ahmiyad gaar ah siinayo in carruurta laga difaaco waxyeellaada ka dhalata weerarrada.

[21] Xeerka Afaraad ee Geneva, qodobka. 50.

[22] Borotokoolka Dheeriga ah II, qodobka. 4(3)(a).

[23] Eeg Xeerka Afaraad ee Geneva, qodobka. 28; iyo Borotokoolka Dheeriga ah I, qodobka. 51(7). Mamnuucidda in bani'aaddanka gabbaad laga dhigto ayaa ku jirta xeer-dhaqameedka iyo weliba colaadaha hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn. Eeg ICRC Customary Law Study, xeerka 97.

GCPEA

THE ROMÉO DALLAIRE CHILD SOLDIERS INITIATIVE

DALHOUSIE UNIVERSITY